FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

Waxa la soo saaray
12ka Bisha 9aad , 2008

## Warbixin Gaar ah - Falanqaynta Guga 2008 Kadib

Warbixintan kooban ee gaarka ah ee FSAU waxay kusoo hordhigaysaa natiijooyinkii muhiimka ahaa oo kooban ee ka soo baxay sahammadii iyo falanqayntii Gugii 2008 , taasoo ah natiijooyinkii ka soo baxay howgalladii gudaha waddanka laga sameeyey (4tii-22kii Bishii 7aad), goob-shaqeedyo heerar goboleed iyo heerar qaran ah oo lagu falanqaynayay muddadii (23kii Bishii 7aad – 13kii Bishii 8aad) iyo farsamo xaqiijin iyo kulan loogu bandhigayay hay'adaha la isbaahaysto (Nafaqada 13kii Bishii 8aad iyo Sugidda Cunnada 20kii Bishii 8aad). FEWS NET Soomaaliya iyo waliba 55 hay-adood oo la isbahaystay oo ay ku jiraan maamullada gobollada, hay'adaha Qaramada midoobay, ururrada samafalka maxalliga iyo kuwa caalamiga ayaa ka qayb qaatay oo taageeray qaabkii sahammadda iyo falanqaynta Guga.

FSAU waxay kusoo bandhigtay natiijooyinkaas kulan gaar ah oo lagu qabtay qolka shirarka ee Xafiis Maamuleedka Taageerada Soomaaliya ee magaalada Nairobi 22kii bishii 8aad waxaana ay soo saartay war saxaafadeed 26kii bishii 8aad. Warbixinnada gobollada Soomaaliya waxaa lagu soo bandhigay magaalada Garoowe (24ka iyo 28ka bisha 8aad), Hargeysa (1da Bisha 9aad), Baydhaba (3da bisha 9aad), iyo Doolow (6da Bisha 9aad). War saxaafadeedka, bandhigidda qoraallada, ooy wehliyaan khariidadda iyo jaantuska kala duwannanta heerarka banii'aadannimo , qiyaasta dadka ee gobollada, degmooyinka iyo aagagga hab-nololeedyada, waxaa laga helayaa websaytka FSAU.

- Cimilada
- Colaad Sokeeye
- Beeraha
- Xoolaha
- Suuqyada
- Nafaqada
- Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

### NATIIJOOYINKA UGU MUHIIMSAN

Natiijooyinka ka soo baxay sahamadii xilliga Guga 2008 ee FSAU, FEWSNET iyo hay'adaha ay isbahaystaan waxay xaqiijinayaan warbixinnadii hore ee la sameeyey bilihii 4aad iyo 7aad oo inay sii socon doonto kasii darraanshaha xiisadda bina-aadamnimadu ooy waliba xawaare dheer ku socon doonto.. Wuxuu sahankani ku Qiimayay 3.25 oo malyuun oo qof, oo ka dhigan 43% isku darka dadweynaha Soomaaliya, inay u baahan doonaan gargaar bina-aadam-nimo ugu yaraan ilaa dhammaadka sannadkan, tiradaas oo korortay 77% marka lagasoo bilaabo bishii 1aad ee 2008. Tirada degdegga u korortay ee dadka u baahan gargaar waxaa u sababa xiisadda hubinta cuntada sii kordhaysa ee reer magaalka, oo saamaynaysa in ka badan 705,000 oo ah dadka saboolka ah ee reer magaalka iyo xiisadda nolosha ee dadka deggan miyiga iyo daabiyadaha ee sii fogaanaysa oo muujisay in 64% ay kororto dadka miyiga daabiyadaha deggan, wuxuu ka kordhay 850,000 oo uu ahaa sannadkan horraantiisii gaarayna in ka badan 1,395,000 hadda. Waxaa intaas wehliya, tirada dadka ka barakacay colaadda oo waliba sii kordhaya ayaa iminka lagu qiyaasay 870,000.

Masiibadan bina'aadminimo ee soo shaac-baxaysa waa mid baahsan, heerka dhibaatada iyo saboolnimada dadka ku dhacayana waa mid naxdin leh. Mid ka mid ah lixdii carruura ee da'doodu ka yar-tahay shan sano ayaa nafaq-darro xun ku sugan, tiraduna way sii kordhaysaa. Heerarka nafaqa-darrada ee ka jira badi koonfurta iyo gobollada dhexe ee Soomaaliya way ka sarreeyaan heerarka gurmadka oo ah 15%, goobo badanna iminka way ka sareeyaan 20% waanay sii kordhaysaa. Tirada carruurta reer magaalka iyo dadka soo barakacay ee nafaqa-darro aad u ba'an ku sugan ayaa sii kordhaysa . Waqooyiga, oo heerarka nafaqadarradu ay caadi ahaan hooseeysay oo xasillooneyd, ayaa iminka xaaladda nafaqadu ka sii daraysaa .

Mid ka mid ah arrimaha ugu waaweyn ee xiisaddan ka dambeeyaa waa colaadda sokeeye ee sii kordhaysa taasoo aan keenaynin oo qura in dadka ay dhibaato soo gaarto ah dil, rabshado, xadgudubyo lagu samaynayo xuquuqda aadanaha, iyo dadkoo la barokiciyo, balse waxay abuuraysa xiisad dhaqaale oo iminka saamayn ballaaran oo burbur ku leh dadweynaha guud iyo xaaladda bina'aadamnimada. Saamaynta xiisadda dhaqaale ee sii xumaanaysa oo ay calaamad u yihiin qiimaha dhaca lacagta, ganacsiga iyo howlaha suuqyada oo khalkhal galay iyo sicir-barar aad u sarreeya oo la xiriira cuntada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah, arrimahaas oo ay sii xumeeyeen roobabkii Gugan oo guud ahaan liitay oo keenay in wax-soo-saarka dalagga dalku uu intii caadiga ka hooseeyo iyo abaar iyo biyo yarida ba'an ee sii darraanaysa oo ka jirta deegaannada xoola-dhaqatada. Inkastoo wax-soo-saarka dalagga Guga ee Baay iyo qaybo ka mid gobollada shabeellooyinka la filayo inuu wax ka tarto caqabadaha hortaagan fursad-u-helidda cuntada bulshooyinka ku nool miyiga iyo daabiyadaha ee dhulalkaasi, saamaynta guud ee ay ku yeelan doonto qiimaha cuntadu ayaa mid wax ku ool noqon doonin. Qiimaha cuntada waxa la filayaa inuu sarreyn doono, sidaas darteed fursad-u-helidda cuntada ee qoysaska cunno soo iibsiga ku tiirsan oo ay ku jiraan dadyawga saboolka ah ee reer magaalka, reer guuraaga iyo beerallayda ee saboolka ah, xoola-dhaqatada iyo dadka gudaha dalka ku barakocayba way ku sii adkaan doontaa ilaa bisha 12aad ee sannadkan.

Afarta qodob ee salka u ah xiisadda manta waa:

**Abaarta sii dabadheeraanaysa iyo Baahi Gargaar Bina'aadminimo ee ka jirta gobollada dhexe, Hiiraan iyo Bakool:** Tirada dadka reer guuraaga iyo beerallayda ee deggan deegaanada abaaruhu ku habsadee ayaa ku suagan xaaladda **Gurmad Bina'aadamnimo (GB) iyo Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** wayna sii kordhaysaa, waxana iminka lagu qiyaasay inay tahay **605,000 oo qof.** Xaaladdan ka sii dartay waxaa u sabab ah waa mar kale oo roob yari ah, kan oo ah xilligii afraad oo isku xiga ooy sidaasiyoo kale dhacdo, waxaa kaloo weheliya sicir-barbar aad u sarreeya oo la xiriira cuntada iyo waxyaabaha aan cunnada ahayn ee lagama maarmaanka ah oo ay ku jiraan biyuhu. Tan waxaa lagu xaqiijiyey warbixinada nafaqada ee dhowaan soo baxay oo muujinaysa inay laba jibbaarantay tirada carruurta nafaqa-darrida xumi hayso ee la geeyey xarumaha quudinta ACF ee Galgaduud, xaaladda nafaqo darrida waa **Halis** welina way ka sii daraysaa gobollada dhexe balse Bakool oo xaaladdeeda nafaqo darri ahayd mid **Halis** ayaa kasii xumaatay oo noqotay mid **Aad Halis u ah** (Khariidadda 1).

Abaartani waa tii ugu xumayd ee uu gobolkaasi soo maro tobannaan sanno waxaana sal u ah biyo iyo baad yaraan; guurguur aan caadi ahayn oo fara badan oo saameeyay dad iyo duunyaba oo loogu guuray goobaha leh biyo rasmi ah ; xoolaha oo weydoobay qiimo jab iyo caano yari ba'an, ; waxaa kordhay dhimashada awrta rareeyada ah iyo ariga, iibinta xoolaha dhaqmaadka ah, heerarka deynta oo aad kordhay iyo guud ahaan fursad-u-helidda cuntada oo sii yaraatay. Roobabka la filayo kama soo horrayn doono bartamaha bisha 10aad, qiimaha cuntaduna way sii kordhi doonaan, sidaas darteed, xaaladdu

Cinwaanka:
FSAU - Somalia
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka:
+254 20 374 5734
Faakiska:
+254 20 3740598
Iimayka:
fsauinfo@fsau.or.ke
www.fsausomali.org

way ka sii dari doontaa, taasoo ka dhigaysa waxqabadyada lagu taageerayo bina'adamnimada iyo hab-nololeedka mid aad muhiim u ah.

**Xiisadda hubinta cuntada reer magaalka oo sii kordhaysa:** Soomaaliya waxaa soo food saartay xiisad cusub oo hubinta cuntada ah kuna soo kordhaysa reer magaalka  sababtoo ah sicir-bararka aadka u sarreeya ee la xiriira qiimaha cuntada iyo waxyaabaha kale.  Qiimaha cuntada dalka iyo ta dibedda laga keenaba waxay gaartay heerka  diiwaangelinta, isagoo kordhay ilaa 340% intii u dhaxaysay lixdii bilood ee la soo dhaafay iyo 700% tan iyo sannadkii la soo dhaafay. Qiimuhu weli wuu sii kacayaa isbaddelna lama filayo.  Qoysas badan oo kale oo reer magaal ah ayaa ku dhici doona xaaladda **Xiisadda Cunto iyo Hab-nololeed Daran (XCHD) iyoGurmad Bini'aadaminimo (GB)**, maddaama aanay xamili karin qiima kororka joogtada ee cuntada, kaasoo si weyn u mija-xaabinaysa awooddooda wax iibsiga.  Iminka waxaa lagu qiiyaasay in dad ka badan **705,000** oo reer magaal ahi ay ku sugan yihiin **XCHD** (565,000) ama **GB** (140,000), waxay korortay 22% marka loo eego qiyaasihii bishii 4aad ee 2008. Intooda badani ama 88% tiradaasi waa  qoysas sabool ah oo reer magaal ah, dadka ugu badan ee reer magaalka ahi  ee tabaalaysan  (53%) waxa ay ku sugan yihiin koonfurta Soomaaliya , waxaa ku xiga waqooyi-galbeed (20%), waqooyi-bari  (18%) iyo gobollada dhexe (9%). Reer magaalka saboolka ahi ee lagu tilmaamay inay ku jiraan **Gurmad Bina-aadminimo (GB)** badidoodu waxay joogan magaalooyinka muhiimka ah ee Afgooye, Muqdisho, Dhuusa-mareeb, Laas Caanood, Ceerigaabo iyo Burco. Inta badan ee reer magaalka saboolka ahi ayaa si ba'an u daymaysan iminka  waxayna  ku dhaqmayaan xeelado is-dabbaraad qalafsan sida cuntada oo waqtiyada qaar la iska dhaafo,  dawarsi ama tuugsi,  hantidooda ooy iibiyaan iyo inay u kacdoomaan xeryaha si ay  taageero u helaan  ('keynaan').

**Ururisanaanta Dadka Tabaalaysan ee gobollada Shabeellooyinka:** Gobollada Shabeellooyinka (Shabeellada Hoose iyo Dhexe) waxay weli yihiin kuwa sida ba'an ay u  saamaysay xiisadda bina'aadamnimada ee iminka jirta. Tirada guud ee dadka ay xiisaddu saamaysay waa reer guuraaga, beerallayda, reer magaalka iyo  dadka ku barokacsan gobollada Shabeellooyinka iyo Muqdishoba, waxaa lagu qiyaasay 1.08 milyan oo qof , taasoo ka dhigan in 62% uu kor u kacay laga billaabo bishii 1aad ee 2008. Dadka reer guuraaga iyo beeralayda ah ee ku jira **Xiisadda Cunto iyo Hab-nololeed Daran XCHD) iyo Gurmad Bina'aadaminimo (GB)**, waxaa lagu qiyaasay 475,000 oo qof, meesha dadka reer magaalka ahi lagu qiyaasay 110,000 oo qof. Waxaa intaas dheer labadaas gobol waxay iminka martigeliyaan tirada ugu badan ee dadka cusub ee ka soo barokacay Muqdisho oo isku darkoodu ka badan yahay 410,000 oo qof**.**

Waxa ku sugan  gobollada Shabeellooyinka tirada carruurta nafaqo la'aanta ba'an ee ugu sarraysa ee Soomaaliya, oo lagu qiyaasay 34% gobolka Shabeellada Hoose iyo 38% gobolka Shabeellada Dhexe.  Xaaladdan ka sii daraysa waxaa u sabab ah saamaynta isbiirsatay ee dib u dhaca roobabkii Guga 2008 oo liitay, xilli kale oo wax-soo-saarka dalagu uu ka hooseeyey caadigii; xaaladda daaqsinka oo gabaabsi ah, isbeddel la'aanta sicir-bararka sare oo sii socda ee qiimaha cuntada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah; awoodda wax

tirada dadweynaha

Sanduuqa 1: Tiro la isku daray oo ah dadka deggan miyiga, magaalooyinka iyo dadka soo barakacay ee Soomaaliya , bishii 7aad-12aad ee 2008

| Gobolka | Isku Darka Tirada Dadka ee UNDP 2005 | Isku Darka Tirada Dadka ee UNDP 2005 | Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee UNDP 2005 1 | Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) | Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) ee Haysata Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah 2 | Dadka Magaalooyinka ee ku jira Gurmad Bina-aadamnimo (GB)2 | Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee ee ku jira Gurmad Bina'aadamnimo (GB)2 | Isku Darka Dadka ku jira XCHAX iyo GB oo ah % Tirada Guud ee Dadweynaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Waqooyi** | | | | | | | | |
| Awdal | 305,455 | 110,942 | 194,513 | 10,000 | 5,000 | 0 | 0 | 5 |
| Woqooyi Galbeed | 700,345 | 490,432 | 209,913 | 10,000 | 20,000 | 0 | 0 | 4 |
| Togdheer | 402,295 | 123,402 | 278,893 | 55,000 | 50,000 | 20,000 | 0 | 31 |
| Sanaag | 270,367 | 56,079 | 214,288 | 20,000 | 30,000 | 5,000 | 0 | 20 |
| Sool | 150,277 | 39,134 | 111,143 | 15,000 | 20,000 | 5,000 | 0 | 27 |
| Bari | 367,638 | 179,633 | 202,737 | 80,000 | 0 | 25,000 | 0 | 29 |
| Nugaal | 145,341 | 54,749 | 75,860 | 25,000 | 10,000 | 0 | 0 | 24 |
| **Isku darka** | **2,341,718** | **1,054,371** | **1,287,347** | **215,000** | **135,000** | **55,000** | **0** | **17** |
| **Gobollada Dhexe** | | | | | | | | |
| Mudug | 350,099 | 94,405 | 255,694 | 30,000 | 50,000 | 0 | 55,000 | 39 |
| Galgaduud | 330,057 | 58,977 | 271,080 | 15,000 | 60,000 | 10,000 | 115,000 | 61 |
| **Isku darka** | **680,156** | **153,382** | **526,774** | **45,000** | **110,000** | **10,000** | **170,000** | 49 |
| **Koonfur** | | | | | | | | |
| Hiiraan | 329,811 | 69,113 | 260,698 | 20,000 | 65,000 | 5,000 | 115,000 | 62 |
| ShabelleDhexe | 514,901 | 95,831 | 419,070 | 30,000 | 100,000 | 0 | 150,000 | 54 |
| ShabelleHoose | 850,651 | 172,714 | 677,937 | 65,000 | 125,000 | 15,000 | 100,000 | 36 |
| Bakool | 310,627 | 61,438 | 249,189 | 25,000 | 65,000 | 0 | 80,000 | 55 |
| Baay | 620,562 | 126,813 | 493,749 | 35,000 | 15,000 | 0 | 0 | 8 |
| Gedo | 328,378 | 81,302 | 247,076 | 30,000 | 80,000 | 0 | 20,000 | 40 |
| Jubbada Dhexe | 238,877 | 54,739 | 184,138 | 25,000 | 35,000 | 0 | 5,000 | 27 |
| Jubbada Hoose | 385,790 | 124,682 | 261,108 | 45,000 | 25,000 | 0 | 0 | 18 |
| **Isku darka** | **3,579,597** | **786,632** | **2,792,965** | **275,000** | **510,000** | **20,000** | **470,000** | **36** |
| **Banaadir** | **901,183** | **901,183** | **-** | 30,000 | **-** | 55,000 | **-** | 9 |
| **Isku Darka Guud** | **7,502,654** | **2,895,568** | **4,607,086** | **565,000** | **755,000** | **140,000** | **640,000** | **28** |

| Tirada dadka la qiimeeyey iyo kuwa  ay suurtagal tahay inay galay XCHAX & GB | Tirada saamoobay | % ee Isku darka guud ee dadweynaha | Qaybinta dadweynaha ku jira xiisad |
|---|---|---|---|
| Dadka Magaalooyinka ee La Qiimeeyey ee ku jira XCHAX & GB | **705,000** | **9**[5] | **22%** |
| Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee la Qiimeeyey ee ku jira XCHAX & GB | **1,395,000** | **19**[5] | **43%** |
| Qiyaasta tirada dadka cusub ee soo barokacay –oo la cusboonaysiiyey 1dii bishii 8aad | **870,000**[4] | **12**[5] | **27%** |
| Qiyaasta tirada dadka muddada dheer barakacsanaa | **275,000** | **4**[5] | **8%** |
| Qiyaasta dadka deggan dhulka miyiga ah, magaalooyinka & dadka barokacsan ee ku jira xiisad | **3,245,000** | **43**[5] | **100%** |

1 Waxa laga soo qaatay: Qiyaasaha Dadweynaha oo heer gobol/degmo ah, UNDP Soomaaliya, 1da bishii 8aad ee 2005.  FSAU ma soo koobto qiyaasaha dadweynaha maddaama ay yihiin qiyaaso rasmi ah oo ay bixisay UNDP

2 Tirooyinka la qiyaasay waxa lagu soo koobay shanta kun ee ugu dhow, taasoo ku salaysan dadka deggan iyadoo aan la tix gelin guuritaanka hadda iyo ka la filyo, waxana ku jira dadka Halis Sare ugu jira  XCHAX ama GB taasoo loogu talagalay in loo isticmaalo qorshaynta.

3  Dan Gorayo waxay ku jirtaa gobolka Bari taasoo ku billaabantay xogta tirakoobka dadka ka hor UNDP/WHO 2005

4 Waxa laga soo qaatay UN-OCHA/UNHCR: Dadka Cusub ee Gudaha Dalka ku barkacsan oo la cusboonaysiiyey 1dii bixhii 8aad ee 2008 (868,160) oo lagu soo koobay 5,000 ee ugu dhow. Dadka muddada dheer barakacsanaa oo ah qiyaas dib loo habeeyey oo ay soo saareen UN-OCHA/UNHCR (hore waxay u ahayd 400,000) kadib dadka cusub ee soo barakacay oo ku jira tirada dadka muddada dheer barakacsanaa (bishii 2aad ee 2008)

5 Boqolkiiba isku darka guud ee dadweynaha Soomaaliya oo lagu qiyaasay 7,502,654 (UNDP/WHO 2005)

iibsiga oo hoos u dhacday; howlaha suuqyada iyo ganacsiga oo khalkhal galay, iyo colaadda sii kordhaysa oo qax iyo barokac dadweyne sababay.

**Xiisadda hab-nololeedka Reer-Guuraaga ee ka soo shaac baxday waqooyiga:** Waxaa ka soo shaac baxay **Xiisadda Cunto iyo Hab-nololeed Daran (XCHD)** waqooyiga iyadoo ay reer-guuraagu la hardamayaan sidii ay ula qabsan lahaayeen xilli labaad oo roob yaraan jirto, biyo iyo baadka oo ka sii daray,, qiimaha biyaha iyo cuntada oo aad u sii kordhaya. Si ay ula tacaalaan, reer-guuraagu waxay iibinayaan xoolo dheeraad ah, waxaa kala qaybinayaan xubnaha, waxayna u guuraan iyagoo xoolahooda wata goobaha biyo iyo baadkaba leh. Waxaa arrimaha ka dhashay in qiyaastii 125,000 oo qof oo reer-guuraa ah noqdaan **XCHD oo ku nool** habnololeedyada Hawd, Sool, Karkaar, Dharoor, iyo dooxada Nugaal. Marka loo eegayo sida Deyrta roobabkeedu noqdaan (bisha 10aad iyo 11ad) iyo heerka kororka sicirka cuntada iyo biyaha ee bilaha soo socda, waxaa jirta halis dhexdhexaad ah oo ka imanaysa in qaar ka mid ah qoysaskaasi laga yaabo inay galaan **GB** intaanu dham-maan sannadkani.

## SAAMAYNTA JAWAAB-CELINTA

1. **Wax qabadyada si loo kordhiyo baaxadda howlaha bina'aadaminimo si loo hubiyo in tirada sii kordhaysa ee dadka baahani u helaan gargaar.**
2. **Dadka ree miyiga iyo beeralayda ee ay xiisaddu ku haysato koonfurta iyo gobollada dhexe**

**Kuwa ku jira Gurmad Bina'aadamnimo (GB):** In dardar la geliyo gurmadka gargaarka bina'aadaminimo oo is dhafan si loo badbaadiyo no-losha, gaar ahaan goobaha ay abaartu saamaysay (gobollada dhexe, Hiiraan iyo Bakool), iyo weliba gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe oo ay ku sugan yihiin dad badan oo u baahan gargaar. Tirada guud ee dadka reer miyiga iyo beerallayda ku jira **GB** (640,000) ayaa 85% waxay kala joogaan saddex meelood oo Shabeellada Hoose iyo Dhexe (250,000), gobollada dhexe (170,000), iyo Hiiraan (115,000), intooda bandanna waxay yihiin beero-iyo-xoola-dhaqato (55%) iyo reer-guuraa (31%). Tallabooyinka waxtarka **GB** waxa ka mid ah:

- Cunto gargaar ah oo isu dheelitiran; biyo nadiif ah/badbaado leh iyo in la ilaaliyo ilaha biyaha; qaybinta milanka cusbooyinka ee fuuq-celinta (ORS); tayaynta caafimaadka iyo faya-dhowrka; abuuritaanka xarumo dheeraad ah oo quudinta iyo nafaqaynta ah iyo hooy ay galaan dadka gudaha dalka ku barokacsani, ololeyaal tallaal; iyo in laga hirgaliyo rugo caafimaad oo guurguura.
- Ilaalinta iyo taageeridda hab-nololeedka waa u muhiim qoysaskaasi si dib loogu soo celiyo awooddooda iyo la tacaalidda iyo soo kabsashada (eeg fursadaha waxtarka hab-nololeedka ee hoos ku qoran).

**Kuwa ku jira Xiisad Cunto iyo Hab-nololeed Daran (XCHD):** In dardar la geliyo taageerada isku-dhafan oo gurmad hab-nololeed ah oo la siiyo beero-iyo-xoola-dhaqatada iyo reer-guuraaga koonfurta iyo gobollada dhexe lana ilaaliyo lana horjoogsado inaanu baabi'in hantida habnololeedka khaasatan, gaar ahaan goobollada ay abaartu sida ba'ani u saameysay ee gobollada dhexe, Bakool iyo Hiiraan. Goobaha ay xiisadda ba'ani ee hab-nololeed ka jiraani waa gobollada dhexe, Hiiraan iyo Bakool (240,000 ama 32% oo dadka reer-guuraaga iyo beerallayda ayaa xiisad ku jira). Goobaha kale ee ay xiisad ba'ani oo hab-nololeed ka jiraan waa beero-iyo-xoola-dhaqatada iyo beeralayda deggan Shabeelooyinka (225,000), Gedo (80,000), Jubbooyinka (60,000), iyo Baay (15,000).
Tallaabooyinka Waxtarka u ah **XCHD** waxa ka mid ah:

- Hab-nololeedyada reer-guuraaga iyo beero-iyo-xoolo-dhaqatada: In laga taageero ila-biyoodka ee xoolaha si loo yareeyo sicirka biyaha, taas oo ay ku jiraan dayac tiridda ilaha biyaha; hagaajinta iyo dayactiridda ceelasha matoorka; in la siiyo matooro kayd ah,; shidaalka oo laga kabo, iyo biyo dhaamis. Taageerooyinka kale ee habnololeedyada ee la tixgalinayo waxaa ka mid ah caafimaadka xoolaha oo wax laga qabto, fududaynta deymaha iyo ka iibinta xoolaha caatada ah sicir la qaadan karo, iyada oo hilbahana dib loogu qaybinayo qoysaska u saboolsan.
- Hab-nololeedyada beero-iyo-xoola-dhaqatada iyo webiyada (Hiiraan/Shabeellada Hoose iyo Dhexe, Gedo iyo Jubbooyinka): In la kordhiyo fursad-u-helidda tacab-gashi wax-soo-saarka dalagga si loogu diyaar garoobo abuurka xilliga Deyrta ee 2008/09 (kabidda tacab-gashiga abuurka, qalabka, falidda iyo shidaalka matoor waraabka). Taageerada kale ee hab-nololeedka waxa ka mid ah maalgelinta yar-yar; mucaawano lacageed (lacag shaqo ku baddalasho); horumarinta tas-hiilaadka kaydka; hawlo dakhli abuurid ah oon ahayn kuwa beeraha; wax qabadyo cunto gargaar ah (is-weydaarsi cunto iyo shaqo, cunto lagu beddesho hanti, cunto quudin laga sameeyo dugsiyada); taageeridda mashaariicda waraabka oo heer kooban ah; iyo in la dayac tiro gabiyada wabiga ee dillaacay, kaabadaha iyo keliyada.
- Dhammaan hab-nololeedyada: In la sameeyo wax qabadyo is barbar socda oo dib loogu habeeynayo ilaha biyaha si ay dadku u isticamaalaan; waxbarashada/wacyigelin la xiriirta caafimaadka iyo faya-dhowrka; ololeyaal tallaal, cunno quudin laga sameeyo dugsiyada, qaaraamaadka dugsiyada oo laga dhaafo; in xarummo quudinta oo la xushay laga sameeyo goobaha ay nafaqa-darro darani ay ka jirto iyo in la taageero adeegyada caafimaadka bulshada iyo rugaha caafimaadka guura.

Sanduuqa 2: Qaybinta dadka xiisadda ku jira ee deggan dhulka miyiga ah ee Soomaaliya

| Habnololeedka | Qiyaasta dadweynha Saamoobay ee hab nololeedyada | Xiisad Cuntada iyo hab nololeedka ah oo aad ee Xun (XCHAX) | Gurmad Baniaadamnimo (GB) | Isugeynta XCHAX iyo GB | % isugeynta XCHAX iyo GB |
|---|---|---|---|---|---|
| Beero-iyo-xooola-dhaqato | 1,889,027 | 320,000 | 350,000 | 670,000 | 48 |
| Habnololeedka Kaluumeysatada | 10,689 | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Xoola-dhaqato | 2,340,538 | 330,000 | 200,000 | 530,000 | 38 |
| Dadka dhulka | 366,833 | 105,000 | 90,000 | 195,000 | 14 |
| **Isku Darka Guud** | **4,607,086** | **755,000** | **640,000** | **1,395,000** | **100** |

| Gobolka | Isku Darka Tirada Dadka ee UNDP 2005 | Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee UNDP 2005 | Xiisad Cuntada iyo hab nololeedka ah oo aad ee Xun (XCHAX) | Gurmad Baniaadamnimo (GB) | Isugeynta XCHAX iyo GB | % isugeynta XCHAX iyo GB |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Central | 680,156 | 526,774 | 110,000 | 170,000 | 280,000 | 20 |
| North East | 1,213,324 | 488,510 | 10,000 | 0 | 10,000 | 1 |
| South | 4,480,780 | 2,792,965 | 510,000 | 470,000 | 980,000 | 70 |
| North West | 1,128,394 | 798,837 | 125,000 | 0 | 125,000 | 9 |
| **Isku Darka Guud** | **7,502,654** | **4,607,086** | **755,000** | **640,000** | **1,395,000** | **100** |

3. **Dadka dhiban ee ku nool dhulka miyiga ah ee Waqooyiga**

**<u>Kuwa ku jira dhibka Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (DHCHAX):</u>** In loo sameeyo waxqabadyo lagu taageerayo xooladhaqatada sida cusub u galiya xaalad ah DH**CHAX** oo ay ku jiraan Hawdka Togdheer iyo Hargeisa, Dooxada Nugaal iyo Sool. Marka la eego isku darka dadka deggan dhulka miyiga ah ee ku jira (dhibka) xiisad ah DH**XCHAX**, 135,000 ama 18% ayaa ku nool waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed, dadkaasi badi waa xoola-dhaqato iyo in yar oo beero-iyo-xoola-dhaqato ah. Fursadaha wax qabad waxa ka mid ah:

- Wax qabadyada lagu taageerayo hab-nololeedka ee loo baahan yahay waxa ka mid ah ka fududaynta deynta , fursad-u-helid adeegyo taageera deyn bixinta; ilaalinta hantida wax-soo-saarka sida (biyaha, daaqa, caafimaadka) iyo dhulka daaqa (xakamaynta nabaad guurka, dhirta loo gubayo dhuxusha); lacag ama cunto shaqo isku beddelashada (oo ku wajahan hanti kordhin iyo mashaariic horumarineed); wax qabadka xannaanada xoolaha; kaydinta iyo ilaalinta daaqa.
- Horumarinta habka qiimo ku kordhinta (hilibka, haragga); iyo maal gelinta (ka taageerida xoolaha, abuurka, qalabka wax-soo-saarka, dawooyinka xoolaha, bacriminta)
- Hagaajinta mashaariicda reer miyiga sida (waddooyinka iyo suuqyada) iyo hantida kale ee hab-nololeedka (faleenka iyo xabagaha); iyo in la abbaaro shabakadda badbaadada bulshada (xawaalad, warqado wax lagu iibsan karo ama lagu beddalan karo, cunto quudin laga sameeyo dugsiyada)
- Wax qabadyo isbarbar socda oo dib loogu habeeyo ilaha biyaha ay dadku isticmaalaan; qaybinta milixda ama cusbada fuuq-celinta ; waxbarasho xagga caafimaadka iyo faya-dhowrka ah; ololeyaal tallaalka; abuuritaanka xarummo quudinta iyo nafaqaynta oo laga sameeyo goobaha ay nafaqa-darrada heerka xun ee sarraysaa ka jirto; iyo in la taageero adeegyada caafimaadka ee gudaha/xarrumaha caafimaadka

  ee guur guura ayaa iyana loo baahan yahay si looga baxo heerarka halista ah ee nafaqa-darrada.

5. **Dhibka cunno yari ee Dadweynah Magaalooyinka**

**<u>Kuwa ku jira Gurmad Bina'-aadamnimo (GB):</u>** In la sameeyo gargaar bina'aadamnimo oo is ku dhafan oo deg-deg ah lana siiyo saboolka magaalooyinka (140,000) ee deggan magaalooyinka waaaweyn ee Burco, Ceerigaabo, Laas Caanood, Boosaaso, Dhuusa-Mareeb, Belet Weyne, Afgooye iyo Muqdisho. Fursadaha wax qabad waxaa ku jira:

- In la taageero xarrumaha caafimaadka ee gudaha, ololeyaasha tallaalka, abuuritaanka xarumo quudinta iyo nafaqaynta ah oo goobo la xushay laga abuuro iyo abuuritaanka cusbitaallo gudaha oo laga sameeyo goobaha ay dhibaatadu ka jirto; ololeyaal caafimaadka guud ah oo ku saabsan caafimaadka iyo faya-dhowrka; iyo qaybinta waxyaabo biyaha lagu dhaansado/ kaydsado goobaha ku habboon.
- Sugidda iyo taageerada hab-nololeedka ayaa iyana muhiim u ah qoysaska magaalooyinka si ay uga maciinsadaan dib u soo celinta awooddooda u adkaysiga dhibaatada iyo dib u soo kabashada (eeg suuro galnimada taageerada hab-nololeedka ee hoos ku qoran).

**<u>Kuwa ku jira dhibka Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (DHCHAX):</u>** Taageero hab-nololeedka ah oo deg deg ah ayaa loo baahan yahay in la siiyo dadka saboolka ah ee magaalooyinka ee aan awoodi karin inay u adkaystaan qiimaha cuntada ee aadka kor ugu kacay iyo awoodda wax iibisiga ee hoos u dhacaysa. Tirada ugu badan ee dadka magaalooyinka ee ku jira xaalad DH**CHAX** waxay ku badan yihiin koonfurta (300,000 or 53%), waxa xiga waqooyiga (215,000 ama 38% ku nool waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed), badidooduna waa qoysaska 'sabool' ah (88%). Dadka magaalooyinka deggan ee ku jira xaalad ah DH**CHAX** (565,000) tiradoodu waxay u dhowdahay ama u sarraysaa sida ta dadka deggan dhulka miyiga ee ku jira DH**CHAX** (755,000). Qaababka taakuleyntu waxay noqon karaan:


- Barnaamijyada howlaha guud ee lacagta lagu wareejiyo (warqado diiwaan gelin lacag qaadasho, shaqo lacag ku bedelesho ); hirgelinta barnaamijyada shabakadda badbaadada ee bulshada; adeegyada bulshada oo hore loo mariyo; wax barashada oo la taageero (cuntada dugsiyada laga bixiyo, cunto guryaha loo qaato, lacagta waxbarashada dugsiyada oo la dhaafo); maalgelin lagu sameeyo mashaariicda beeraha iyo barnaamijyada tababarrada; barnaamijyada la xiriira shaqo cunto lagu beddesho; taageerada cuntada ee laga bixiyo xarrumaha caafimaadka; kabidda adeegyada lagama maarmaanka ah (kirada guryaha, korontada , biyaha, baabuur fuulka); iyo fududaynta deynta.
- Wax qabadyo is barbar socda oo dib loogu habaynayo ilaha biyaha si ay dadku u isticmaalaan; qaybinta milanka fuuq celinta; waxbarasho caafimaadka iyo faya-dhowrka ah; ololeyaasha tallaalka; abuuritaanka xarumo quudinta iyo nafaqaynta ah oo laga sameeyo goobaha nafaqa-darro xun ay ka jirto; iyo taageerada adeegyada caafimaadka iyo xarumaha caafimaadka ee guur guura.

Sanduuqa 3: Qaybinta dadka xiisadda ku jira ee magaalooyinka Soomaaliya

| Gobolka | Isku Darka Tirada Dadka ee UNDP 2005 | Isku Darka Tirada Dadka ee UNDP 2005 | Xiisad Cuntada iyo hab nololeedka ah oo aad ee Xun (XCHAX) | Gurmad Baniaadamnimo (GB) | Isugeynta XCHAX iyo GB | % isugeynta XCHAX iyo GB |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Gobollada Dhexe | 680,156 | 153,382 | 50,000 | 10,000 | 60,000 | 9 |
| Waqooyi | 512,979 | 234,382 | 105,000 | 25,000 | 130,000 | 18 |
| Gobollada Koofureed | 4,480,780 | 1,687,815 | 300,000 | 75,000 | 375,000 | 53 |
| Waqooyi Galbeed | 1,828,739 | 819,989 | 110,000 | 30,000 | 140,000 | 20 |
| **Isku Darka Guud** | **7,502,654** | **2,895,568** | **565,000** | **140,000** | **705,000** | **100** |

| | Xiisad Cuntada iyo hab nololeedka ah oo aad ee Xun (XCHAX) | Gurmad Baniaadamnimo (GB) | Isugeynta XCHAX iyo GB | % isugeynta XCHAX iyo GB |
|---|---|---|---|---|
| Sabool | 480,000 | 140,000 | 620,000 | 88 |
| Dhexadhexaad | 85,000 | 0 | 85,000 | 12 |
| Hodannimo | 0 | 0 | 0 | 0 |
| Isku Darka Guud | **565,000** | **140,000** | **705,000** | **100** |

## Khariidadda 1: KHARIIDADDA QOONDAYNTA XAALADAHA EE ISKU XIRAN EE SOOMAALIYA, Saadaasha dadka deggan dhulka miyiga ah, magaalooyinka iyo dadka gudaha ku barokacsan, bisha 7aad-bisha 12aad ee 2008




Food Security Analysis Unit - Somalia http://www.fsausomali.org
P.O. Box 1230 Village Market, Nairobi, Kenya Email: fsauinfo@fsau.or.ke
tel: 254-20-3745734 fax:254-20-3740598
FSAU is managed by FAO.
The boundaries and names on these maps do not imply official endorsement or acceptance by the United Nations.
The regional & District boundaries reflect those endorsed by the Government of the Republic of Somalia in 1986.

**Khariidadda qoondaynta xaaladaha ee Guga '08 Kadib**

## XAALADDA CUNNO YARI EE HAYSATA MAGAALOOYINKA SOOMAALIYA

Bishii 3aad ee 2008, FSAU waxay samaysay qiimaynteedii u horraysay ee Hubinta Cuntada Magaalooyinka oo degdeg ah si ay u qiimayso sicir-bararka aadka u sarreeya ee ka jira suuqyada Soomaaliya iyo si ay u hubiso saamaynta ay ku leedahay dadka deggan magaalooyinka, gaar ahaan saboolka magaalooyinka (eeg natiijooyinka ku taxan Warbixinta Hubinta Cuntada iyo Nafaqada ee FSAU ee Bishii 5aad ee 2008). Bishii 6aad ee 2008, FSAU waxay mar kale ku samaysay qiimayn degdeg ah ee nolosha magaalooyinka si ay u xaqiijiso in heerka helidda cuntada ee dadka deggan magaalooyinku inay ka sii dartay iyo in kale, sicir-barbarka sare uu sii socda awgeed. Waxaa intaas dheer, si ay u tijaabiso in natiijooyinkii bishii 3aad ay goobo kala duwan oo matali kara, FSAU waxay ballaarisay goobaha ay qiimaynta ku samaysay bishii 6aad, iyadoo ka kordhisay 29 magaalo iyo tuulo gaarsiisayna 51 magaalo iyo tuulo.


Si ay u xaqiijiso in ay saboolka magaalooyinku u adkaysanayaan sicir-bararka sarreeya, FSAU waxay diyaarisay qiyaas ah kharashka ugu yar ee suuqa loogu baahan yahay; waxay xisaabisay qiimaha ku baxaya kharashkaas ee magaalo kasta seddex jeer (Bishii 3aad ee 2007, Bishii 3aad ee 2008 iyo Bishii 6aad ee 2008); waxaana ay uruurisay war ku saabsan kharashka qoysasku ay isticmaalaan dhab ahaan iyo heerkooda dakhliga, iyadoo eegaysa sida ay labadaasi isu beddeleen seddexdaas muddo. Falanqayntan waxaa la barbar dhigay tilmaameyaal kale oo ah natiijooyinka tix raaca Qoondaynta Xaaladda Hubinta Cuntada oo ay ku jiraan xaaladda nafaqada guud ee dadka deggan magaalooyinka, oo ay ka mid yihiin heerka nafaqo darro ee cabirka wareegga cududda iyo kala duwanaanta cuntada; jiritaanka cudurrada; tirada dadka barakacay ; heerka ama xaaladda nolosha ee dadka deggan dhulka miyiga iyo xaaladda nabad-gelyada, si loo xaqiijiyo Qoondaynta Xaaladda Hubinta Cuntada ee dadka deggan magaalooyinka Soomaaliya.

Si loo qiyaaso sicir bararka qiimaha, FSAU waxay diyaarisay kharashka ugu yaraan ee suuqa lagu isticmaali karo si loo helo cuntada lagama maarmaanka ah sida haruurka//mesaggada, saliidda wax lagu karsado iyo sonkorta (taasoo siin karta 2100 kaalari (tamar)/qofkii / maalintii qoyska) iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah oo aan cunto ahayn (tusaale ahaan biyaha, gaaska la shito, xaabada) , iyadoo waxoogaa ay kala duwan yihiin si loo tixgeliyo kala duwanaanta heerarka kharashka ee u dhexeeya gobollada iyo kuwa u dhexeeya magaalooyinka iyo tuulooyinka (eeg shaxda 4 ). Markaas kadib waxay qiyaastay kharashka ugu yar ee la isticmaali karo ee magaalo kasta oo la qiimeeyey seddexdaas jeer (Bishii 3aad ee 07, Bishii 3aad ee 2008, iyo baaritaan la ballaariyey oo la qabtay bishii 6aad ee 2008), iyadoo la isticmaalayo FSAU/FEWSNET ascaarta suuq yada muhimka ah/ xogta SLIMS (ascaar laga soo ururiye tuulooyin) si loo xaqiijiyo xogta qiimaha baaritaanka. Qiimayntu waxay muujinaysaa inuu si weyn u kordhay kharashka ugu yar ee suuqa loo istimaali karo seddexdaas jeer . Sannad gudihiis, laga billaabo bishii 3aad ee 2007 ilaa bishii 3aad ee 2008, celceliska kharashka ugu yar ee suuqa loo


Sanduuqa 4: Kharashka ugu yar ee lagu isticmaali karo suuqa

| KHARASHKA UGU YAR EE SUUQA LOO ISTICMAALI KARO | KOONFUR | | GOBOLLADA DHEXE/WAQOOYI | |
|---|---|---|---|---|
| | Cuntada Ugu Yar | | | |
| **DALAG:** | Magaalo | Tuulo | Magaalo | Tuulo |
| Hadhuudh/Meseggo | 95kg | 95kg | 95kg | 95kg |
| Daqiiq | 3.75kg | 3.75kg | 3.75kg | 3.75kg |
| Sonkor | 5kg | 5kg | 5kg | 5kg |
| Saliidda Wax Lagu Karsado | 4Lt | 3Lt | 4Lt | 3Lt |
| Caano | 15Lt | x | 20Lt | x |
| Hilib | 4kg | 2kg | 10kg | 5kg |
| Shaaha Caleenta Ah | 0.5kg | 0.5kg | 0.5kg | 0.5kg |
| Milix/Cusbo | 1.5kg | 1.5kg | 1.5kg | 1.5kg |
| Digir | 6kg | x | 4.0kg | x |
| | WAXYAABAHA AAN CUNTAD AHAYN EE UGU YAR | | | |
| Gaas | 1.5Lt | 1.5Lt | 1.5Lt | 1.5Lt |
| Saanbuunta Adag Ee Dharka Lagu Maydho | 4pcs | 4pcs | 4pcs | 4pcs |
| Xaabo | 30 | x | 10 | x |
| Dhuxul | 5 | 5 | 5 | 5 |
| Biyo (Jeerikaanka Qaada 20lt) | 20,000 | 10,000 | 20,000 | 10,000 |
| Dawooyinka Dadka | 1 | 1 | 1 | 1 |
| Lacagta Lagu Bixiyo Waxbarashada Dugsiyada | 30kg | 30kg | 9kg | 13kg |
| Kharashka Dalagga Lagu Ridqo/Cajiimo | 30,000 | 30,000 | 30,000 | 30,000 |
| Dharka | 12,500 | 12,500 | 12,500 | 12,500 |
| Cashuurta Bulshda | 30,000 | 30,000 | 30,000 | 30,000 |
| Waxyaabo Kale(Qayax) | | | | |

Jaantusta 1: Isku Darka Kharashka Ugu Yar ee Suuqa loo Isticmaali KaroTuulooyinka (Bishii 3aad ee 2007, Bishi 3aad ee 2008 iyo Bishii 6aad ee 2008)





Jaantusta 2: Isku Darka Kharashka Ugu Yar ee Suuqa loo Isticmaali Karo Magaalooyinka (Bishii 3aad ee 2007, Bishi 3aad ee 2008 iyo Bishii 6aad ee 2008)



isticmaali karaa wuxuu kordhay 85% magaalooyinka iyo 71% tuulooynika marka laga reebo waqooyi galbeed(eeg jaantuuska 1 iyo2). Kororka macnaha leh ee ku dhacay kharashka ugu yar ee suuqa loo isticmaalo waqtigan asaga ah waxaa ugu wacnaa kororka baaxadda leh ee ku dhacay beeca Hadhuudh/massagada ee meelo badan. Sababtoo ah massagadu waxay u taagan tahay qeybta ugu badan oo loo isticmaalo kharashka ugu yare ee qoysku isticmaalo. Sicir barar kasta oo ku dhaca qiimaha masagada wuxuu si xoog leh u sameynayaa isku darka kharashka ugu yar uu qoysku isticmaalo.

**Khariidadda 2: Khariidadda Qooyndaynta Xaaladaha ee Isku xiran ee Soomaaliya, saadaasha dadka deggan magaalooyinka iyo dadka Gudaha ku barakacsan, Bisha 7aad-Bisha 12aad ee 2008**





Seddex bilood gudahood, bishii 3aad ee 2008 ilaa bishii 6aad 2008, sidoo kale waxaa la arkay inuu kordhay kharashka ugu yar ee suuqa loo isticmaali karaa, mar labaad waxaa u sabab ah kororka macnaha leh ee ku dhacay qiimaha Hadhudhka/masaga. . Waqooyi-bari, gobollada dhexe iyo koonfurta, celceliska heerka uu kordhay kharashka ugu yaraan ee suuqa loo isticmaali karaa laga billaabo bishii 3aad ee 2008 ilaa bishii 6aad ee 2008 wuxuu noqday 52% (magaalooyinka iyo tuulooyinkaba), kharash kororka ugu badani wuxuu ka dhacay magaalooyinka. Kharashaka kordhay ee ugu badani wuxuu ka dhacay magaalooyinka Qoryoolay (105%), Belet Weyne (75%) iyo Garoowe (75%); iyo tuulooyinka Qaliwiley (Afmadow) (87%) iyo Hasbahalle (Eyl) (63%). Xitaa waqooyi-galbeed oo guud ahaan ay arrimuhu ka xasilloon yihiin Soomaaliya inteeda kale, kharashka ugu yar ee suuqa loo isitimaali karaa wuu kordhay, gaar ahaan magaalooyinka Boorame iyo Boodhley (Gabiley). Celceliska heerka uu kordhay kharashka ugu yar ee suuqa loo isticmaali karo ee waqooyi galbeed ee magaalooyinka iyo miyiguba wuxuu ahaa 36%. Marar ka qaar ah, waxaa jira kala gedisnaan macno leh ee kharashka ugu yare e la isticmaalo una dhexeysa magaalooyin isla hal gobol ah. Mar labaad arrintaas waxaa u sabab ah beeca ama iibka kala gedisan ee hadhuudhka/masagada ee magaalooyinkaas. Laga billaabo bishii 3aad ee 2007 ilaa bishii 3aad ee 2008, celceliska kharashka ku kordhay wuxuu ku sii badnaa magaalooyinka (102%) marka loo eego tuulooyinka (76%); hase yeeshee, laga billaabo bishii 3aad ee 2008 kala duwanaantani way dhammaatay, maddaama celceliska kharashka kordhay ee la diiwaangeliyey uu ahaa 52% magaalooyinka iyo tuulooyinkaba, taasoo muujinaysa heerar isku mid ah oo sicir-bararka aadka u sarreeya inuu ka jiro magaalooyinka iyo tuulooyinkaba. Waxaa intaas dheer, celceliska heerka kharashka ugu yar ee suuqa loo isticmaali karaa uu kordhay bishii wuu ka badnaa laban laab intii u dhaxaysay labada muddo. Laga billaabo bishii 3aad ee 2007 ilaa bishii 3aad ee 2008, celceliska bishii ee heerka uu kordhay kharashka ugu yar ee suuqa loo isticmaali karo ee magaalooyinku wuxuu ahaa 7%, tuulooyinkana wuxuu ahaa 6%; hase yeeshee, laga billaabo bishii 3aad ee 2008 ilaa bishii 6aad ee 2008, celceliska bishii ee heerka kharashka ugu yar ee suuqa loo isticmaalaa wuxuu ahaa 18% magaalooyinka iyo tuulooyinkaba, taasoo sii caddaynaysa heerka uu gaarsiisan yahay sicir barbarka sare ee Soomaaliya.

Iyadoo ka mid ah falanqaynta magaalooyinka, FSAU waxay isticmaashay celceliska heerarka dakhliga ee qoysaska saboolka ah si ay u xisaabiso faraqa u dhexeeya kharashka ugu yar ee suuqa loo isticmaali karo magaaladiiba (inta kharashka ugu yara ee suuqa loo isticmaali karo ee qoysasku aanay awoodin). Inkastoo FSAU ay weli ku jirto horumarinta qaabka xog ururinta deg dega ah ee sahamada magaalooyinka, falanqaynta faraqa ku jira kharashka bisha 6aad ee 2008 waxay muujisay hoos u dhac weyn oo ku yimi awoodda wax iibsiga ee saboolka magaalooyinka ku nool gobollada waqooyiga ee Sool, Sanaag iyo Bari; gobolka Galgaduud ee gobollada dhexe; Gedo iyo gobollada Shabeellooyinka. Faraqa ku jira kharashka ee ugu sarreeya waxa laga diiwaan geliyey Laas Caanood (-42%), Ceerigaabo (-44%), Caabudwaaq (-33%) iyo Afgooye (-32%), taasoo muujinaysa sida halista ah ee aanay u awoodi karin saboolka magaalooyinku inay u adkaystaan sicir-barbarka aadka u sarreeya ee ka jira goobahaas. Iyadoo la isticmaalyo falanqaynta faraqa ku jira kharashka, cabbirka wareegga cududda ee nafaqa darrida iyo xogaha kale ka immanaya gudaha iyo qaabka isbedelka, FSAU waxay soo saartay Qoondaynta Xaaladda nolosha oo loogu talagalay magaalooyinka. Tilmaameyaashu waxay muujiyeen in xaaladda hubinta cuntada ee saboolka magaalooyinku ay ka sii dartay taniyo bishii 3aad. Tirade guud ee dad ku nool magaalooyinka ee ku jira xaaladda dhib Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (DHCHAX) iyo xaaladda gurmadka bani aaddanimo(GB) waa 705,000 kaasoo kordhay 22%, marka la bar bar dhigo qiyaastii la sameeya bisha afraad ee sanakan 2008. tirada ugu badan ee dadka magaalooyinka ku nool ee ku jira dhibka cunno yarida waxay ku sugan yihiin koonfurta(53%); waxaa xiga waqooyi Galgeed(20%); waqooyi bari(18%) iyo Gobollada dhexe(8%). siddeetan iyo sideed boqolkiiba (88%) dadka saboolka ee magaalloyinka ku nool ayaa ku jira xaalad xun oo cunno yari, tasoo ah 480,000 dadka saboolka ee magaalooyinka inay ku jiraan (DHCHAC) and 140,000 (GB). Magaalooyinka laga helay saboolka ugu badan ee ku jira GB iyo cabirka ugu sarreeya nafaqo darada laga cabiro cududa waxay yihiin Ceerigaabo, Laas caanood, Bossasso, Dhuusa mareeb,Belet weyne, Afgoye iyo Mogadishu.


Guud ahaan, falanqaynta magaalooyinku waxay muujisay in inkastoo saboolka magaalooyinku ay isticmaaleen habab kala duwan oo ay ugu adkaysanayaan sicir-bararka sarreeya oo ay ka mid yihiin inay dhimeen inta ay la eegyihiin cuntada iyo waxyaabaha lagama maarmaanka ah ee ay iibsadaan, inay u wareegeen isticmaal cunto qiimo jaban, inay cuntada waqtiyada qaar iska dhaafaan, inay iibiyeen hantidooda hab-nololeedka ee lagama maarmaanka ah iyo inay raadsadeen xawaalad dheeraad ah, cunto gargaar ah iyo deeq, haddana kuwo badani weli ma awoodaan inay daboolaan baahidooda cuntada aasaasiga ah, iminkana waxay arkeen inay ku jiraan deyn aad u badan, taasoo aad ugu nuglaysay haddii qiimaha cuntadu uu sii kaco aayaha dambe. Xaaladda hubinta cuntada magaalooyinka ee sii kordhaysa ee Soomaaliya waxay u eg-tahay inay sii xumaan doonto bilaha soo socda, taasoo ku sii adkaynaysa saboolka magaalooyinku inay dhibaatada u adkaystaan. FSAU waxay ku wadi doontaa inay kormeerto saamaynta uu sicir-bararka sare ku yeelanayo dadka magaalooyinka saddexdii biloodba mar.

## ARRIMAHA UGU MUHIINSAN QAYBAHA


Khariidadda 3: Isku Darka Roobabka (mm) 1dii Bishii 4ad –30kii Bishii 6aad ee 2008




**Khariidadda 4: Boqolkiiba Roobabka Caadiga ah (1dii Bishii 4ad –30kii Bishii 6aad ee 2008)**




Khariidadda 5: Muuqaalka Aan Caadiga Ahayn ee Cabirka Cagaarka Dhulka Bishii 6aad ee 2008





Waxa laga soo qaatay: FEWS NET, NOAA, CPC

## CIMILADA

Guud ahaan sida ay u da'een roobabkii Guga 2008, marka la eego goobaha ay gaareen iyo xoogooda, badi caadi way ka hooseeyeen sidaas darteed si xun ayay u saameeyeen xaaladaha miraha/firrida iyo Beeraha ee badi qaybaha dalka (Khariidadda 3). Billowga roobabkii Gugu dib wuxuu u dhacay saddex toddobaad koonfurta iyo gobollada dhexe, marka laga reebo dhulka xoola-dhaqatada ee gobollada Jubbooyinka, qaybo ka mid ah gobolka Gedo oo soohdin la leh Kiiniya iyo qaybo ka mid ah gobolka Baay. Waxa intaaas dheer, roobabkii xilliga Gugu waqti ka horreeya sida caadiga ah, dhammaadkii bishii 5aad, ayay istaageen. Gobollada Shabeellada Dhexe, Bakool, Hiiraan iyo gobollada dhexe si gaar ah waxa u saameeyey dib-u-dhaca billowga roobabka Gugu iyo sida liidata ee ay u da'een.

Jaantusta 3: Cabirka Cagaarka Miraha Roobabka ku Baxa ee Shabeellada Hoose, 30kii Bishii 7aad ee 2008




Waxa laga soo qaatay: JRS-MARS

Inkasta oo sawirka dayax-gacmeedku uu muujinyo in roobab fiicani ay da'een (daruuraha ku daboolan dartood) badi goobaha ay abaartu saamaysay ee Bakool, Hiiraan, iyo gobollada dhexe, warka la soo uruuriyey ee laga soo xaqiijiyey gudaha iyo warbixinada guduhu waxay xaqiijiyaan in roobabkii Gu'gu guud ahaan aay xumaayeen . Sidaas darteed, helitaanka biyaha, iyo xaaladaha baddaka (salool iyo Xaab) ee goboladaasi aad ayay u liitaan. Qaybaha deriska ah ee Itoobiya, iyagana roobabka Gu'gu way liiteen, taasoo keentay in xoola-dhaqato ay si aan caadi ahayn uga soo gudbeen soohdinta oo ay u soo guureen Soomaaliya (eeg Qaybta Xoolaha). Dhinaca kale, gobollada Jubbooyinka iyo gobolka Bay (marka laga reebo degmada Buurxakaba), roobabku badi waxay ahaayeen caadi, taasoo keentay in xaaladaha miraha/firrida iyo seeruhu(dhulka daaq) ay wanaagsan yihiin (Khariidadda 3).

Roobabka Gu'gu way liiteen goobaha xoola-dhaqatada muhiimka u ah oo ku yaalla gobollada waqooyiga ee Sool, Sanaag, Togdheer iyo Nugaal, taasoo keentay inay ka sii daraan xaaladaha seeraha (dhulka daaq) maddaama roobabkii Derytii 2007/8 ay iyana ka hooseeyeen caadi. Gobolladaasi iminka waxa soo food saaray biyaha iyo daaqa oo aad u yar. Markii la is barbar dhigay roobabka hadda iyo celceliska muddada dheer waxa muuqata in si weyn ay hoos ugu dhaceen roobabka gobolladaasi, iyadoo heerarka haddu ay u dhexeeyaan 20% ilaa 40% keliya sida caadiga u ah mudadda u dhaxaysa bisha 4aad iyo bisha 6aad. Waxaa sidan ka reeban goobo yar oo ka tirsan hab-nololeedka xoola-dhaqatada ee Cadduun ee gobollada dhexe, badi gobolka Bari, iyo qaybo ka tirsan Nugaal, Awdal iyo Hawdka Hargeysa, goobahaas oo roobabka Gu'gu ay caadi ka sarreeyeen (Khariidadda X).
Waqooyi-galbeed, inkastoo roobabku ay badi caadi ka hooseeyeen oo ay taabteen miraha/firrida gallayda ee muddada gaaban ku baxda, haddana roobabka Karanta (Bishii 8aad – Bishii 10aad) ee muddada dheer da'ayay ayaa la soo sheegay inay aad u fiicnaayeen gaar ahaan degmooyinka beeraha muhiimka u ah ee Gabiillay, Hargeysa iyo Boorame.

Roobabkii xagaaga oo caadi ka sarreeye oo ka da'ay dhammaadkii bishii 5aad illaa bishii 7aad dhulka xeebaha ee gobollada Jubbooyinka iyo Shabeellooyinku waxay bixiyeen waxtarkii loo baahnaa iyagoo si weyn u hagaajiyey xaaladaha seeraha iyo miraha/firrida ee goobo ay roobabkii hore ee Gu'gu ahaayeen kuwa aan si fiican u di'in oo meelo yar ku kooban, siiba gobolka Shabeellada Hoose. Roobab badan oo qiyaastoodu ay


u dhaxayso 20 - 80 mm ayaa da'ay muddo afartan maalmood ah oo isxigay (20kii bishii 5aad – 30kii bishii 6aad) waanay sii socdeen ilaa bishii 7aad. Inkasta oo sawirka dayax-gacmeedka ee heerarka roobabku aanu muujin sidan, warbixinaha guduhu waxay xaqiijiyeen in roobabkaasi ay hagaajiyeen miraha/firrida taagan, waxaana ay keeneen inuu kordhay dhulka lugu abuuray gallayda xilliga caadiga ah ka baxsan. Abuurkan la ballaariyey dartiis, badi degmooyinka gobolka Shabeellada Hoose oo miraha/firrida aan lagu guulaysan waxa la filayaa in gallay wanaagsan la goosan doono dhammaadka bisha 9aad/horraanta bisha 10aad.

Roobabka xagaaga ee wanaagsani waxay ka muuqdaan xaaladaha daaqa ee wanaagsanaaday sida laga arko muuqaalka cabirka cagaarka dhulka ee sawirka dayax-gacmeedka (Khariidadda 5). Caadi ahaan, roobabka xagaagu waxay ka da'aan dhulka xeebaha ee koonfurta Soomaaliya waxaana ay gaareen ilaa 100 km marka laga soo billaabo badweynta Hindiya. Hase yeeshee, warka ka imanaya guduhu wuxuu xaqiijinayaa in xooga ay ku da'een iyo dhulka ay gaareen roobabka xagaagu bishii 6aad ay aad u wanaagsanaayeen, iyadoo roobabku ay ka da'een dhul ka badan sida caadiga ah.

## SAAMAYNTA TOOSKA AH

Colaadda hubaysan iyo nabad gelyo-darradu way sii kordhaysaa waxaana ay ku sii socotaa inay toos ah u keento dhibaato ku timaadda dadka sida ku tumasho xuquuq aadami, rabshado, dil iyo dembiyada sii kordhaya iyo dadka oo barokaca. Waxa intaas dheer, nabadgelyo darrada sii korordhaysa waxa kale oo ay qasaysaa ganacsiga iyo dhaqdhaqaaqyada dhaqaale, iyo shabakadaha gaadiidka, taasoo keenaysa inay lunto ama burburto hantidu isla markaana koobaysa fursad-u-helidda barnaamijyada bina'aadamnimo. Xaaladda nabad gelyada ee Muqdishu waa mid weli aad u shidan.

Khariidadda 6: Natiijooyinka Nabad Sugid La'aanta, Bisha 7aad-Bisha 8aad ee 2008




Waxa laga soo qaatay: FSAU, July 2008

Wararku waxay muujinayaan in dadka weli Muqdisho joogaa ay iminka ku nool yihiin xaalad argagixiso leh iyo in ay si joogta ah halis ugu jiraan in la dhibaateeyo. Degmooyin badan oo magaalada gudaheeda ah ayaa maran oo laga qaxay. Hanti badan oo ay qoysaska iyo ganacsatadu lahaayeenna waxa laga tegay markii laga qaxayay rabshadda, hantidaas oo la bililiqaystay ama la burburiyey. Coladda sokeeye ee sii kordhaysaa waxay ku sii socon doontaa inay koobto howlaha ganacsiga iyo dhaqaalaha iyo inay xaddido dhaqdhaqaaqa dekedda iyo suuqyada gudaha iyo bannaanka magaaladaas, sidaas darteed arrimahani waxay sii wadayaan qiim kac xagga badeecadaha lagama maarmaanka ah iyo hoos u dhac ku yimaada fursadaha dakhli helidda ee dadka weli ku haray Muqdisho.

Gobolka Hiiraan, xaaladda nabadgelyadu iyana way ka sii daraysaa. Bishii 7aad gobolkaas waxa ku dagaallamay ciidamada Itoobiyaanka iyo kooxo mucaarid ah/ka horjeeda. Hantida lagu burburinaya duqaynta iyo bililiqaysiga, dilka dadka rayidka ah iyo xad gudubyo kale oo xuquuqda bina'aadamka lagu sameeyey ayaa la soo sheegay. Coladda sii socota waxay keentay in si buuxda uu burburay dhaqaalaha magaalada Belet Weyne maaddama uu go'ay xiriirkii ka dhexeeyey magaalada iyo dhulka miyiga ah. Dad fara-adan ayaa ka guuray magaalooyinka waaaweyn (Belet Weyne iyo Buulo Burte) oo u guuray dhulka miyiga ah iyo gobollada deriska ah. Dhowrkii bilood ee la soo dhaafay, dad ka badan 70,000 oo qof (oo badi ah sabool) ayaa ka guuray magaalada Belet Weyne oo u guuray dhulka miyiga ah ee dibedda uga baxsan, dadkaas oo iminka ay soo food saartay xaalad adag oo bina'aadamnimo oo ka timi cunto, biyo iyo hoy la'aan. Waxa intaas dheer, hantida iyo ilaha wax soosaar ee bulshooyinka deggan dhulka miyiga ahi culays ayaa saaran maddaama ay halgan ugu jiraan inay marti geliyaan dadka soo barokacay ee ka soo guuraya magaalooyinka.

Dhammaadkii bishii 8aad, Jubadda Hoose waxaa laga soo sheegay inuu ka dhacay dagaal culus oo dhex maray malayshiyooyinka qaabaa'ilka ee gacanta ku hayey Kismaayo tan iyi horraantii sannadkii 2007 iyo ciidamadda ururka Midowga Maxkamadaha Soomaaliyeed. Kadib 2-3 maalmood oo uu dagaal culusi socday, ciidamada midowga maxkamadaha Soomaaliyeed ayaa dib u qabsaday Kismaayo oo ah dekadda ugu weyn ee koonfurta Soomaaliya. Dagaalkaas, dad ka badan 70 qof ayaa lagu dilay, boqollaal qofkna waa lagu dhaawacay. Waxa intaas dheer, tiro muhiim ah oo dadweynaha ka mid ah ayaa ka qaxay magaalada Kismaayo oo u qaxay dhulka miyiga ah ee dibedda uga baxsan magaalada. Rabshaddu way istaagtay tan iyo markaas, laakiin goobtaas weli xiisad ayaa ka jirta. Lixdii bilood ee la soo dhaafay, tirada dadka ka qaxaya Muqdisho waxay korortay 23%, iyadoo ka kacday 703,200 bishii 1aad ee 2008 noqotayna 868,160 bishii 7aad ee 2008. Badi dadkaas dhowaan soo qaxay ama 45% waxa ay isugu urureen gobolka Shabeellada Hoose, oo horeba ay u soo food saartay arrimaha ay ka midka yihiin xalaadii ugu xumayd marka la eego fursad-u-helidda cuntada, hab-nololeedka oo burburaya iyo heerar Gurmad ah oo xagga nafaqada ah. Isla muddadaas, 30% dadka gudaha ku barokacsan oo dheeraad ah ayaa la soo sheegay inay ku sugan yihiin Banaadir, iyadoo dadku ay ka guurayaan tuulooyinka ay nabadgelyo-daradu ka jirto oo ay u guurayaan goobaha badbaadada leh ee magaalooyinka waaweyn.

Dadka dhowaan soo barakacay waxa keenayaan inay ka sii darto xaaladda bin'aadamnimada ee goobo badan oo ka tirsan waddanka. Saamaynta gaar ahaan waxa laga dareemaya goobaha ay horeba u joogeen tiro badan oo ah dad soo barokacay sida gobollada Shabeellooyinka, Hiiraan iyo gobollada dhexe. Dadkaas soo barokacay waxay ku urursan yihiin gobollo ay bulshada martida loo yahay horeba uu culays u saarraa oo ay soo food saareen Xaalado Cunto iyo Hab-nololeed Aad u Xun (XCHAX) ama Gurmad Bina'aadamnimo (GB). Tirada dadka barakacay ee sii kordhaysa, gaar ahaan dadka ka qaxaya Muqdisho, waxay sii kordhinaysaa culayska saaran bulshada martida loo yahay taabanaysana cuntada iyo biyaha iyo mashaariicda caafimaadka, iyadoo kordhinaysa baahida loo qabo guryaha la kiraysto isla markaana kordhinaysa tartanka loogu jiro fursadaha shaqada ee horeba u yaraa.

Waxa intaas sii dheer, dadka barokacay iyo bulshada ay martida u yihiin waxay si adag ula tacaalayaan qiimaha cuntada iyo waxyaabaha kele ee gaaray heerkii ugu sarreeyey ee inta la ogyahay. Afduubidda iyo dilka shaqaalaha gargaarka bina'aadamnimada ee Muqdisho iyo gobollada Hiiraan, Galgaduud, Baay, Shabeellada Hoose iyo Jubbada Hoose, waxay iyana keeneen inay aad u sii adkaato in hay'adaha gargaarku ay goobahaas ka howlgalaan. Tan iyo 23kii bishii 1aad, shaqaale gargaar ayaa lagu dilay Soomaaliya, waxana lagu afduubay 18 shaqaalaha gargaarka ah oo 11 qof oo ka mid ah weli la haysto. Halista xagga nabadglyo-darroda ee sii korortay darteed, hay'ado badani horeba waxay ka baxeen goobahaas ama howlahoodii ayay joojiyeen. Kuwa weli joogaana waxa sameeynayaan inta ay awoodaan si ay u gaadhaan dadka gargaarka u baahan; hase yeeshee, dhibaatooyinku marba marka ka damaysa ayay sii adkaanayaan. Iminkana, fursad-u-helidda bin'aadamnimada ee koonfurta iyo gobollada dhexe ee Soomaaliya kuma filla inay daboosho baahida sii kordhaysa ee bina'aadamnimada.

**Saamaynta Aan Tooska Ahayn**

Colaadda dabadheeraatay isla markaana sii kordhaysa iyo colaadda sokeeye waxay abuurayaan xiisad dhaqaale oo dalka oo dhan laga dareemo, taasoo saamayn balaaran oo xun ku leh dadweynaha guud ahaan iyo xaaladda bina'aadamnimada. Xiisadda dhaqaalaha ee soo shaac baxaysaa waxa keenay dhowr arrimihood oo is biirsaday. Howlaha ciidamada militariga iyo kooxaha mucaaridka ayaa si xun u kala jaray ganacsiga (dalagga gudaha iyo badeecadda kale) dalka gudihiisa iyo ka isaga gudba gobollada, taaso keentay inuu hoos u dhaco dhaqdhaqaaqa ganacsi iyo fursad-u-helidda suuqyada taasoo sii kordhisay kharashka gaadiidka badeecadaha keentayna sicir barbar ku dhaca qiimaha suuqyada. Waxa iyana aad u kordhay tirada jid-gooyada aan sharciga ahayn, waxana la soo sheegay baad ama canshuur aan sharci ahayn oo laga qaado dadka ku nool goobaha ay xiisadaha bina'aadamnimadu ka jirto sida gobollada Hiiraan iyo Galgaduud. Buntlaand, waxa ka sii socda colaadaha u dhexeeya qabaailada waxana sii koraraya burcadbadeedyo xaddidaya xaddiga alaabooyinka dibedda lagaga keenayo iyo ganacsiga gudaha. Arrimahaas oo dhami waxay keeneen hoos u dhac ku yimaada dhaqaalaha.

Xiisadda dhaqaale waxa kale oo sii kiciyay lacagta gudaha ee sida aan xakamaynta lahayn ee badan loo daabaco taasoo qayb ahaan lagu maal-geliyo colaadaha gudaha ee sii kordhaya. Lacagta Shilinka Soomaaligya ah ee sida cusub loo daabacay waxa lagu hafiyey suuqyada, taasoo si degdeg ah u kordhisay helitaanka lacagta keentayna inuu aad u dhaco qiimaha Shilinka Soomaaliga oo uu gaaro heerkii ugu hooseeyey tan iyo intii sarrifka lacagta la diiwaan geliyey – qiima dhacaas oo ka dhigan qiimo dhac 165% ah tan iyo bishii 1aad ee sannadkii 2007. Sida weyn ee uu qiima dhacay Shilinka Soomaaliga waxa kale uu door ka ciyaaray sicir-bararbka aad u sarreeya ee cuntada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah, taasoo ay qoysas badan oo deggan dhulka miyiga ah iyo magaalloyinka ee aanay si toos ah colaaddu u saamaynin halgan ugu jiraan inay fuliyaan baahidooda cuntada lagama maarmaanka ah, gaar ahaan dadka saboolka ah ee ku tiirsan suuqyada ee awooddooda adkaysi ee qiimaha cutada sii kordhayna ay kooban tahay, iyadoo awoodooda wax iibsi iyo hanti haysigooduba ay hoos u sii dhacayaan (eeg Qaybta Suuqyada).

Sanduuqa 5: Dadka Cusub ee ka soo barakacay Muqdisho, Bishii 3aad ee 2007 – bishii Afriaad ee 2008

| Gobol | Qiyaasta tirada Dadweynaha (UNDP 2005) | Qiyaasta tirada Dadweynaha magaa-looyinka (UNDP 2005) | Qiyaasta tirada Dadka Gudaha Dalka ku Barokacsan ilaa hadda | % ee isku darka (qi-yaasta) Dadka gudaha dalka ku barokacsan oo heer Gobol ah | % Isku darka heer gobol ee dadweynaha | % isku darka dadwey-naha magaalooyinka |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Awdal | 305,455 | 110942 | **170** | 0 | 0.1 | 0.2 |
| WoqooyiGalbeed | 700,345 | 490432 | **16,120** | 2 | 2.3 | 3.3 |
| Togdheer | 402,295 | 123402 | **1,410** | 0 | 0.4 | 1.1 |
| Sanaag | 270,367 | 56079 | **760** | 0 | 0.3 | 1.4 |
| Sool | 150,277 | 39134 | **4,400** | 1 | 2.9 | 11.2 |
| Bari | 367,638 | 179633 | **8,500** | 1 | 2.3 | 4.7 |
| Nugal | 145,341 | 54,749 | **210** | 0 | 0.1 | 0.4 |
| Mudug | 350,099 | 94405 | **64,050** | 7 | 18.3 | 67.8 |
| Galgaduud | 330,057 | 58977.00 | **129,700** | 15 | 39.3 | 219.9 |
| Hiiraan | 329,811 | 69113.00 | **50,700** | 6 | 15.4 | 73.4 |
| Bakool | 310,627 | 61438.00 | **2,300** | 0 | 0.7 | 3.7 |
| Baay | 620,562 | 126813.00 | **43,480** | 5 | 7.0 | 34.3 |
| Shabeellada Dhexe | 514,901 | 95831.00 | **60,730** | 7 | 11.8 | 63.4 |
| Banaadir | 901,183 | 901183 | **88,000** | 10 | 9.8 | 9.8 |
| Shabeellada Hoose | 850,651 | 172714.00 | **346,110** | 40 | 40.7 | 200.4 |
| Gedo | 328,378 | 81302 | **31,800** | 4 | 9.7 | 39.1 |
| Middle & Lower Jub-booyinka | 624,667 | 179421 | **19,720** | 2 | 3.2 | 11.0 |
| ISKU DARKA GUUD | 7,502,654 | 2,895,568 | 868,160 | 100.00 | 11.6 | 30.0 |

Waxa laga soo xigtay: Qiyaasaha Dadweynaha ee UNDP Somaaliya 2005, tirada barokacsan iyo/ama dib u laabtay, Qaybta Ilaalinta Soomaaliya ee IASU 1dii bishii 8aad ee 2008

## BEERAHA

Soosaarka dalagga Gu'ga 2008 ee koonfurta Soomaaliya ayaa lagu qiyaasay iyuu yahay 84,750 MT, kaasoo ah kii saddexaad ee ugu hooseyey afar iyo tobankii sano ee la soo dhaafay, waxana uu ka dhiganyahay 58% celceliska wax soosaarka dagaalka sokeeye kadib (CDK 1995-2007) iyo 170% soosaarkii dalagga ee gu'gii 2007 oo ahaa kii ugu hooseeyey in ka badan toban sanadood (Sanduuqa 6aad iyo Jaantusta 4aad). Isku darka wax soosaarku wuxuu ka kooban yahay, 50% haruur/mesaggo, 48% gallay iyo 2% bariis.


Sanduuqa 6: Qiyaasaha Soosaarka Dalagga Gugii 2008 ee Soomaaliya

| Gobollada | Soosaarka Gu'ga 2008 oo ah MT | | | Guga 2008 oo ah % Gugii 2007 | Guga 2008 oo ah % Guga Celceliska Dagaalkii Kadib (1995-2007) | Guga 2008 oo ah % Celceliska Shan Sano ee Guga (2003-2007) |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | Gallayda | Haruurka/meseggada | Isku darka dalagga | | | |
| Bakool | 10 | 100 | 110 | 87% | 5% | 16% |
| Baay | 2,200 | 31,500 | 33,700 | 1093% | 93% | 153% |
| Gedo | 800 | 100 | 900 | 1034% | 15% | 31% |
| Hiiraan | 600 | 1,400 | 2,000 | 105% | 51% | 113% |
| Juba Dhexe | 2,400 | 100 | 2,500 | 50% | 28% | 74% |
| Juba Hoose | 5,000 | 40 | 5,040 | 166% | 88% | 212% |
| ShabelleDhexe | 4,200 | 1,200 | 5,450 (7,450)[1] | 68% (93%)[1] | 32% (44%)[1] | 34% (46%)[1] |
| ShabelleHoose[2] | 25,000 | 8,100 | 33,100 | 122% | 52% | 61% |
| **Isku Darka Guud ee Gu'ga 2008** | **40,210** | **42,540** | **82,750 (84,750)[3]** | **170% (175%)[3]** | **58% (59%)[3]** | **80% (82%)[3]** |

*1. Waxa ku jira 2,000MT oo bariis ah oo ka soo baxay Jowhar*
*2. ku ma jirto gallayda xilliga caadiga ah ka baxsan oo lagu qiyaasay 12,000MT oo la filayo in la gooyo bisha 9aad/10aad ee 2008*
*3. Waxa ku jira 2,000MT oo bariis ah oo ka soo baxay Jowhar*

Badi soosaarka dalagga ee Gu'ga 2008 waxa uu ka soo baxay laba gobo loo ah Baay iyo Shabeellada Hoose oo kala ah 40% iyo 39% siday u kala horreeyaan. Tan waxa u sabab ah heerarka roobabka da'ay oo caadi ahaa iyo dhulka waxa laga beeray ee gobolladaas oo kordhay gaar ahaan gobolka Baay. Dib u habaynta biyo-mareennada ugu waaaweyn ee webiga loo istcimaalo waraabinta ee goobaha soosaara dalagga ee Shabeellada Hoose iyana waxay sii kordhisay soosaarka dalagga. Waxa sidan ka duwan, gobollada Bakool, Gedo iyo Jubbada Dhexe oo aan lagu guulaysan soosaarka miraha/firrida, gobolladaas oo soosaarka dalagga lagu qiyaasay 5%, 15% iyo 28% siday u kala horreeyaan marka loo eego celceliska wax soosaarka dagaalka sokeeye ka dib ee xilliga Gu'ga. Heerarkan soosaarka ee aadka caadiga uga hooseeya waxa u sabab ah roobabkii Gu'ga 2008 oo dib u dhacay, liitay, isla markaana aan si siman u di'in.

Jaantusta 4: Isbeddeladda Soosaarka Dalagga ee Gu'ga (1995-2008) – Gobollada Koonfurta




### *Haruurka/meseggada*

Tirada ugu badan ee haruurka/meseggada Soomaaliya waxa laga soo saaraa gobollada Baay iyo Shabeellooyinka, taasoo ka dhigan in ka badan 90% marka loo eego celceliska wax soosaarka dagaalka sokeeye kadib ee koonfurta Soomaaliya. Soosaarka haruurka ee Gu'ga 2008 ee ka soo baxay isla gobolladaasi waxa lagu qiyaasay 40,800 MT, taasoo ka dhigan 96% isku darka soosaarka haruurka ee xilliga Guga iyo 93% marka loo eego celceliska wax soosaarka dagaalka sakeeye kadib ee saddexdaas gobol. Isku darka soosaarka haruurka gu'ga 2008 ee ka soo baxay dhammaan gobollada kale waxa lagu qiyaasay 1,740 MT, taasoo ka dhigan 18% keliya marka loo eego celceliska soosaarka dagaalka sokeeye kadib iyo 4% isku darka soosaarka haruurka oo idil. Heerarka soosaarka ee liita waxa u sabab ah roobabka oo liitay oo aan si siman u di'in.

### *Gallayda*

Gobollada Shabeellooyinka, oo guud ahaan soo saaraa badi gallayda koonfurta soomaaliya, waxay soo saareen 42% oo keliya marka loo eego celceliska wax soosaarka dagaalka sokeeye kadib ee gu'ga iyo 92% isku darka wax soosaarka gallayda ee Gugii 2007. Hase yeeshee, roobabkii wanaagsanaa ee da'ay dhammaadkii bishii 5aad iyo bishii 6aad waxay keeneen in la abuuro gallay xilli ka baxan xilli beereedka caadiga . Iminka gallay ayaa lagu beerayaa badi qaybaha dhulka roobabka ku baxa ee gobolka Shabeellada Hoose waxana lagu qiyaasay inay ka soo bixi doonaan 12,000MT oo dheeraad ahi. FSAU iyo hay'adaha ay gacansaarka leeyihiin waxay qiimayn la xiriira dallaga xilliga aan caadiga ahayn ka samayn doonaan Gobolka Shabeellada Hoose dhammaadka bisha 9aadillaa horraanta bisha 10aad ee 2008 gobolka shabeellada Hoose.

### *Caqabadaha Hortaagan Wax Soosaarka*

Inkasta oo roobabka caadiga ka hooseeyey ee sida siman aan u di'in ay ahaayeen arrin muhiim ah oo keentay in soosaarka miraha/firrida ee xilligani uu liito, sababaha kale ee ay ka mid yihiin biyo-mareennada oo ay ciidi dabooshay, buundooyinka yar yar ee kanaalada lagaga gudbo oo waxyeelo gaartay and fatahaado ka timid qararka/daamanka webiyada oo burburay, iyo waxyeello ka timi xagga cayayaanka, iyo adeegyada beeraha oo liita ayaa xaddidaydhulka wax lagu beero iyo guud ahaan soosaarka dallaga. Soosaarka dalagga ee webiga laga waraabiyo sida hadda uu yahay wuu ka badnaan kari lahaa haddii qalabka waraabintu uu ku fillaan lahaa maamulka webigana la hagaajin lahaa. Waxa intaas dheer, beerallayda oo sheegtay waxyeello ka timi xagga cayayaanka iyo shimbiraha iyo weliba cudurada baal dhiigga iyo maduullaha..

**Bixidda Dalagga Waqooyi-galbeed ee Xilliga Guga/Karanta**

Waqooyiga-galbeed, gobollada beero-iyo-xoola-dhaqatada ah ee Awdal, Galbeed iyo Togdheer, qiyaasaha saadaasha bixista dalaggu waxay ka hooseyaan heerka caadiga, roobabkii Gu'ga 2008 oo liitay isla markaana aan si siman u di'in dartood. Saadaasha bixista soosaarka dalagga ee Gu'ga/Karanta isku darka wax soosaarku ayaa waxaa lagu qiyaasay 10,110 MT, taasoo ka dhigan 56% marka loo eego celceliska dagaalka sokeeye kadib iyo 11% isku darka soosaarka dalagga ee Gu'gan 2008. Hase yeeshee, roobab fiican oo Karanta ah ayaa laga heley gobollada Awdal iyo Galbeed dhammaadkii bishii 7aad iyo bishii 8aad ee 2008, sidaas darteed soosaarka dalagga waxa la filayaa inuu ka sare maro saadaashii bixidda miraha ee la sameeyey ka dib xilligii Qiimaynta Miraha ee Gu'ga 2008. FSAU, iyo hay'adaha ay is bahaystaan waxay qorshaynayaan inay ka sameeyaan Soomalilaand qiimaynta soo go'itaanka raashinka Gu'ga/Karanta 2008 Kadi dhammaadka bisha 11aad illaa horraanta bisha 12aad ee 2008.


***Qiimaha iyo Helitaanka Dalagga***

Falanqanynta FSAU ee baaritaanka soosaarka miraha/firrida iyo helitaanka dalaggu waxay muujinaysaa in qoysas badan oo deggan dhulka miyiga ah ee gobollada Shabeellooyinka, Jubbooyinka iyo Baay ay haystaan xoogaa dalag kayd ah oo lagu qiyaasay inuu hayn doono shan ilaa toddoba bilood. Heerka dalagga kaydka ah ee dalka yaalla wuxuu ku tiirsan yahay heerarkii soosaarka xilliga ee hore iyo kuwa hadda. Tusaale ahaan, gobolka Baay, dalag kayd ah ayaa yaalla ayadoo ay u sabab tahay goy miraha/firrida oo heer caadi ah ama heer ka sarreeya ahaa saddex ka mid ah afartii xilli ee u dambeeyey (*Deyrtii* 2006/07 wuxuu ahaa 228%, *Deyrtii 2007*/08 wuxuu ahaa 129%, Gu'gii 2008na wuxuu ahaa 93% ee celceliska soo saarka dagaalka sokeeye kadib ee Gu'ga). Gobollada Shabeellooyinka oo soosaarka dalaggu uu caadi ka hooseeya, qoysaska ay hantidoodu tahay dhexdhexaad iyo kuwa ladani waxay haystaan kayd dalag oo ku filan isticmaalkooda.


Qiimaha gallayda iyo haruurkuba aad ayay u kordheen laga soo billaabo bishii 1aad ilaa bishii 7aad ee 2008, qiime kororkaas oo u dhexeeyey 220-275%. Marka la barbar dhigo bishii 7aad ee 2007, qiimaha labada dalagba wuxuu kordhay bishii 7aad ee 2008, qiimekororkaas oo ka dhigan 370-700% (Jaantusta 5). Heerarka qiimaha dalagga iyo qiime kororku way kala duwan yihiin marka la eego suuqyada koonfurta Soomaaliya, iyadoo qiimaha ugu sarreeya ee galayda laga diiwaan geliyey gobollada Jubbada Hoose iyo Shabeellada Dhexe (20,000/kg Jamaame iyo Jowhar) qiimaha ugu sarreeya ee haruurka/mesegGadana waxa lagu arkay Belet Weyne iyo Xuddur (15,000 - 17,000/kg). Qiimaha dalagga waxa keenay inuu kordho soosaarka dalagga iyo suuq geyntiisa oo hooseeyey, dalabka ama baahida loo qabo dalagga oo sii korodhay iyo qiime dhaca ku dhacay Shilinka Soomaaliga oo horseeday in kharashka soosaarka iyo gaadiidku uu kordho. Qoysas badan ayaa u haysta kaydkooda inay u isticmaalaan conistooda. Sidaas darteed, si ay u helaan dakhli dheeraad ah qoysaska qaar ayaa sugaya inay iibiyaan kaydkooda marka qiimuhu uu sii kordho.

Bilaha soo socda, qiimaha dalagga waxa la filayaa inuu sii kaco ayna u sabab tahay arrimaha ay ka mid ka yihiin roobabkii Gu'ga 2008 oo guud ahaan sida ay u da'een ay liidatay. Howlaha suuqyada oo carqaladoobay iyo ganacsiga ka dhexeeya gobollada oo xaddidmay colaadda sokeeye darteed, oo ay u dheertaha qiimaha dhaca Shilinka Soomaaliga ayaa waxay door ka ciyaari doonaan in qiimaha dalaggu uu sii kordho. FSAU waxay si qoto dheer ula socon doontaa bilaha soo socda helitaanka iyo qiimaha dalagga ee suuqyada waaweynee dalka.

Jaantusta 5: Isbeddellada Heerka Gobol ee Qiimaha Dalagga (ShSo)




Jaantusta 6: Isbeddellada Heerka Gobol ah ee Iswaydaarsiga Ganacsiga – Dalaga lagu beddelanayo ri





***Iswaydaarsiga Ganacsiga***

Hoos u dhaca howlaha beeraha oo keenay soosaarka miraha/firrida ee Gu'ga 2008 in lagu guulaysan waayo qaybo badan oo koonfurta ka mid ah ayaa waxay horseedeen inay hoos u dhacku yimaada shaqo helidda iyo fursadaha kale ee dakhliga ay ku helaan qoysaska saboolka ah. Hase yeeshee fursadaha Shaqada ee gobollada Baay iyo Shabeellada way sarraysay marka loo eego beer goynta, beer gfalidda, iyo in beeraha laga ilaaliyo cayayaanka (siiba shimbiraha). Dhammaan gobollada koonfurta, dakhligoo la waayay amaba yaraaday iyo sida weyn ee uu qiimaha dalaggu u kordhay waxay si daran u taabteen awoodda wax iibsiga ee qoysaska. Tusaale ahaan, Shabeelloyinka, dhulka haruurka/meseggada ugu badan laga beero iyo gobollada jubbooyinka, iskubeddelashada ganacsi ee ka dhexeeya shaqada iyo dalaggu wuxuu hoos u dhacay 34%, 61% iyo 39% siday u kala horreeyaan intuu u dhaxaysay bishii 1aad iyo bishii 7aad ee 2008. Marka loo eego bishii 7aad ee sannadkii la soo dhaafay, iskubeddelashada ganacsi ee hadda ee u dhexeeya dalagga iyo shaqada ee Shabeellooyinka, dhulka haruurka ugu badan laga beero iyo gobollada Jubbooyinku waa 22%, 66% iyo 66%, siday u kala horreeyaan (Jaantusta 6aad). In si aad ah loola socdo helitaanka shaqo beereedyada ayaa muhiim noqon doontaa dhowrka bilood ee soo socda.

# XOOLAHA

### *Xaaladaha Seeraha iyo Biyaha*

Xaaladaha Seeraha iyo biyha ee goobaha ay abaartu saamaysay ee gobollada dhexe, Hiiraan iyo Bakool iyo goobaha aan helin roobab fiican ee hab-nololeedyada Hawdka Togdheer, Sool, Nugaal iyo Mudug ayaa ka sii daray kadib markii xilli kale aan roobabka lagu guulaysan.  Goobaha kale ee sida xun ay u saameeyeen roobabkii Gu'ga 2008 ee liitay waxa ku jira Gedo, Bakool, Sool iyo hab-nololeedka Dooxada Gabbi ee Sanaag.  Tan iyo bishii 8aad ee 2007, badi qoysaska saboolka ah iyo kuwa ay hantidoodu tahay dhexdhexaad ee deggan goobahaasi waxay ka fursan waayeen xaalado biyo dhaamis. Hase yeeshee, kuwo badani oo dadkaasi ka mid ah wixii hadda ka dambeeya ma ay awoodi karaan inay biyo sii dhaansadaan sababtoo ah waxay deymo badan ku galeen iibsi biyo iyo cunto qaali ah 12kii bilood ee la soo dhaafay. Roobabkii xilliyadii Gu'gii 2007 iyo kuwii Deyrtii 2007/8, iyo weliba kuwii Gu'gii 2008 ee liitay waxay keeneen in badi ceelasha goobaha xoola-dhaqatadu ay qalaleen amaba biyo yareeyeen taasoo ku khasabtay in xoolaha loola guuro dhulka webiyada ee gobollada Gedo iyo Hiiraan, iyo gobollada Baay, Jubbooyinka iyo Shabeellooyinka.  Dhula seereedka Galbeed, Awdal, Shabeellooyinka, Bari, Baay iyo gobollada Jubbooyinku waxay ka faa'iidaysteen roobabkii Gu'gii 2008 oo caadi ahaa, roobabkii Xagaaga ee wanaagsanaa ee ka da'ay koonfurta iyo roobabkii Karanta ee fiicnaa ee ka da'ay waqooyi-galbeed oo dib u buuxiyey biyo galeennada iyo celeesha, horena u mariyey xaaladaha seeraha. Hase yeeshee, xoolaha ka soo guury Kiiniya, Itoobiya iyo gobollada kale ee Soomaaliya ayaa culays saaray khayraadka biyaha iyo daaqa.




### *Guuritaanka Xoolaha*

Guuritaan xoolo aan caadi ahayn ayaa ka socda badi dalka, marka laga reebo guuritaanka caadiga ah ee Galbeed, Awdal, Bari, qaybo ka mid ah Mudug, Baay, Shabeellooyinka iyo Jubbooyinka (Khariidadda 7).  Galgaduud, xoolaha qaar ayaa waxay u guureen Hawdka Togdheer, Shabeellada Dhexe iyo gobolka Soomaalida ee Itoobiya; hase yeeshee xoolo badani way awoodi waayeen inay guuraan xaaladoodda jirka oo liidata darteed, sidaas darteed badi xoolaha waxa khasab ku noqotay inay joogaan degmooyinkooda (khaasatan Degmada Ceel Buur), oo xaaladaha daaqqu ay aad u liitaan. Dhowaan xasilloonida ka jirta Hiiran iyo degmooyinka gobolka Shabeellada Dhexe ee waqooyiga Jawhar iyo Shabeellada Hoose ee Wanle Weyn waxay u suurto geliyeen xoolo ka soo guuray Hiiran (oo badidoodu ah lo' iyo ari) inay u guuraan gobollada Shabeellooyinka iyo Baay. Xoolo ka guuray *Sool* iyo hab-nololeedka dooxada Gabbi ee gobolka Sanaag, Hab-nololeedka Hawd ee Buuhoodle/ Togdheer, Sool, Nugaal iyo Mudug iyo qaybo ka tirsan Hab-nololeedka Cadduun ee Mudug waxay u guureen gobolka Bari. Xoolaha Xeebta Deex ee degmooyinka Cadalle iyo Aadanyabaal ee gobolka Shabeellada Dhexe waxa la sheegay inay u guureen Shabeellada hoose si ay daaq fiican u helaan.  Xoolaha Bakool waxay iyana guureen gobolka Baay, markaas kadibna qaar ka mid ah ayaa u sii guuray gobolka Shabeellada Hoose.

### *Xaaladda Jirka  Xoolaha iyo Koritaanka Tirada Xoolaha*

Xaaladda jrka xooluhu aad ayay u liidataa daaqa iyo biyaha oo guud ahaan ka sii daray goobaha ay abaartu saamaysay ee gobollada dhexe, Hiiraan iyo Bakool iyo goobaha ay roobabku ku yar yihiin ee waqooyiga Mudug, Togdheer, Nugaal, Sanaag iyo Sool. Waxa sidan ka duwan gobollada Awdal, Galbeed, Bari, Shabeellooyinka, Bay, Gedo iyo Jubbooyinka oo xaaladda jirka xooluhu ay tahay caadi ama wanaagsan tahay xaaladda daaqa iyo biyaha ee goobahaas oo guud ahaan wanaagsanaaday  dartood.  Xillgii Gu'ga 2008 may jirin geel, lo' ama ari dhalay gobollada ay abaartu saamaysay sida Gobolladda  dhexe, Hiiraan iyo Bakool.  Dhalmada xooluhu way hoosaysay goobaha ay roobabku ku yaraayeen sida Gedo, Mudug, Nugaal, Togdheer iyo Sanaag. Hase yeeshee, gobollada Jubbooyinka, Bay, Shabeellooyinka, Bari, Awdal iyo Galbeed, heerarka dhalmada geela, lo'da iyo adhigu waxay ahayd dhexdhexaad ama way hoosaysay waayo heerarka rimidda oo ahaa dhexdhexaad ama hooseeyey Derytii 2007/8 adhiga,  Gu'gii/Xagaagii 2007 lo'da iyo Gu'gii 2007 Geela.

Qaabka isbeddellada tirada xoolaha ee Gu'ga 2008 ee FSAU  wuxuu muujinayaa inay hoos u dhaceen tirada xooluhu marka la barbar dhigo dhammaadkii xilligii Deyrtii 2007/8 (Bishii 12aad ee 2007).  Tusaale ahaan, goobaha ay abaartu saamaysay ee gobollada Dhexe, Hiiraan iyo Bakool xoola-dhaqatadu waxay muujinayaa in tirada xooluhu ay hoos u dhacday marka loo eego sida ahayd bishii 12aad ee 2007 (tusaale ahaan tirada geelu waxay hoos u dhacday 18%-31%; lo'du waxay hoos u dhacday 38%-58%; ariguna wuxuu hoos u dhacay 39%-48%). Hoos u dhacan waxa keenay  dhicinta xoolaha oo sarreysay, iyo tirada dheeraadka ee la iibiyey  si loogu bixiyo kharashka sii kordhaya ee  biyo dhaaminta iyo iibsashada  cuntada. Sidoo kale, goobaha ay roobabku ku yaraayeen  ee hab-nololeedyada Hawdka, xoola-dhaqatada Golis/Guban, Sool iyo dooxada Gabbi iyana waxay muujinayaan in tirada xooluhu ay si weyn hoos ugu dhacday, inkastoo aanay weli gaarin heerar ka hooseeya qiyaasta caadiga ah. Waxa sidan ka  duwan  Sool iyo dooxadda Gabbi, oo tirada geela iyo arigu aanay weli ka soo kaban abaartii 2004. Tirada geelu way korortay  bannaanka Sool ee gobolka Bari, hab-nololeedka Xoola-dhaqatada Gudaha ee Koonfurta gobollada Jubbooyinka iyo Gedo, Xoola-dhaqatada Daawaa, Guban/Golis iyo Dooxada Nugaal. Guud ahaan, ma jiraan cuddurro waaweyn oo ku dhacay xoolaha.  Hase yeeshee, waxa jira dhacdooyin cudurka  Sandhiigga oo laga soo sheegay bannaanka Sool ee gobolka Sanaag.  Cudurrada caadiga ah (tusaale ahaan cudurada ka dhashasha shilinta  iyo gooryaanka) si ballaaran ayaa looga soo sheegay gobollada ay abaartu saamaysay.

xoolaha


***Qiimaha xoolaha iyo Awoodadda Wax Iibsiga ee Xoola-dhaqatada***

Qiimaha guud ee dhammaan noocyada xoolaha  Soomaaliya wuu kordhay tan iyo bishii 1aad ee 2007, waxana uu ka sarreeyaa celceliska qiimaha ee 5 sano, tan waxa badi keenay qiima dhaca Shilinka Soomaaliga, qiimaha dalagga ee sii kordhaya iyo guud ahaan culayska ka imanaya sicir-bararka (Jaantusta 7).


Celceliska qiimaha kordhay ee lo'da laga billaabo bishii 1aad ilaa bishii 7aad ee 2008 ee dhulka haruurka ugu badan laga beero, Gobollada Shabeellooyinka iyo Jubbooyinku 144%, 178%, iyo 223% siday u kala horreeyaan ayay u kala sarreeyaan marka la barbar dhigo celceliska 5 sano ee bisha 1aad ilaa bisha 7aad. Sidoo kale, ceceliska bishii 1aad ilaa bishii 7aad ee 2008 ee qiimaha riyaha la dhoofiyo ee waqooyi-bari, waqooyi-galbeed iyo gobollada dhexe aad ayuu uga sarreeyaan marka la barbar dhigo celceliska 5 sano ee  qiimaha ee isla muddadaas. Qiimaha xoolaha waxa la filayaa  inuu kordho isagoo ka jawaabaya qiimaha dhaca Shilinka Soomaaliga iyo guud ahaan isbeddellada sicir-bararka, iyo weliba muddada bisha Ramadaan iyo xilliga Xajka (bisha 9aad iyo bisha 12aad), markaas oo dalabka ka imanaya suuqyada dibeddu uu kordho, hase yeeshee goobaha ay abaartu samaasay ee gobollada dhexe iyo Hiiraan kama faa'iidaysan doonaan qiime kororkaas. Qiimaha riyaha dibedda loo dhoofiyaa xoogaa ayuu hoos u dhacay X bilood ee u dambeeyey gobollada dhexe, waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed, taasoo ay badi u sabab tahay xilligan oo baddu ay kacsan tahay (dabaylaha Mansuunka ee Xagaaga) iyo fursadaha dhoofinta oo sidaas darteed hoos u dhacay.  Sidoo kale qiimaha lo'da ee dhulka haruurka ugu badan laga beero, gobollada Shabeellooyinka iyo waqooyi-galbeed isna waxoogaa ayuu hoos u dhacay.

Inkasta oo qiimaha xooluhu uu aad u kordhay, dakhliga ka soo baxay iibka xooluhu waxba kama bedelin  qiimaha dalagga ee aadka u kordhay.  Sidaas darteed, awoodda wax iibsiga ee xoola-dhaqatada, oo lagu qiyaasay iswaydaarsiga ganacasgia ee ka dhexeeya xoolaha iyo dalaggu aad ayuu hoos ugu dhacay dhammaan gobollada kaasoo gaaray heerarkii ugu hooseeyey iswaydaarsiga ee la diwaan geliyey (Jaantusta  X).  Celceliska iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya ri'da dibedda loo dhoofiyo iyo bariiska ee gobollada dhexe, waqooyi-galbeed iyo waqooyi-bari 50%, 32% iyo 42%, siday u kala horreeyaan, ayay hoosaysaa marka la barbar dhigo celceliska 5 sano ee bisha 1aad ilaa bisha 7aad, waxana weeye iswaydaarsigii ugu hooseeyey muddo toban sano ah.  Tan waxa u sabab ah qiimaha bariiska dibedda laga keeno oo si weyn uga kordhay gobollada dhexe, waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed (421%, 412% iyo  195% isla muddadaas, siday u kala horreeyaan), waxa sidoo kale aad uu kordhay qiimaha dalagga gudaha ee gobollada dhexe iyo waqooyi-bari (270% iyo 243%) marka loo eego celceliska bisha 1aad ilaa bisha 7aad ee 5 sano.

Jaantusta 7: Isbeddellada Heerka Gobol ah ee Iswaydaarsiga Ganacsiga (Ri dibaax ah oo lagu beddelanyo dalag)




Jaantusta 8: Isbeddellada Heerka Gobol ah ee Qiimaha Rida Daabaxa ah (ShSo/ShSl)




***Xoolaha Dibedda Loo Dhoofiyo***

Koonfurta, ganacsiga soohdinta isaga gudba ee ka dhexeeya Soomaaliya iyo Kiiniya ayaa  fiicnaaday bishii 7aad dalabka ka imanaya Kiinya  dartiis. Hase yeeshee, gobollada dhexe iyo waqooyiga, tirada dhammaan noocyada xoolaha ee la dhoofiyey hoos ayay u dhaceen sababtoo ah xaddidaada uu ganacsiga xoolaha ku soo rogay maamulka Itoobiyaanku iyo helitaanka xoola dhoofinta oo aad hoos u  dhacay oo sababeen  abaarta iyo xilliyo is xigay oo aan roobabka lagu guulaysan hab-nololeedyada muhiimka u ah xoola-dhaqatada ee gobollada dhexe iyo waqooyiga iyo gobolka 5aad ee Itoobiya ee deriska ah. Xoolaha dibedda loo dhoofiyey bishii 1aad ilaa bishii 7aad ee 2008 ee la mariyey dekedaha Berbera iyo Boosaaso waxay gaareen 796,737 oo neef, oo 85% ay yihiin adhi. Tani 37% ayay ka hoosaysaa celcelisa bisha 1aad-bisha 7aad ee 5 sano (1,267,530 oo neef), kaasoo ka mid ah tirooyinkii ugu hooseeyey ee la dhoofiyey tan iyo sannadkii 2001.


Shanta salayladood  ee laga dhoofiyo hilibka lagu qalo  dalka, dhammaan waa la xiray tan iyo bishii 1aad ee sannadkan, marka laga reebo laba ku kala yaalla Burco iyo Gaalkacayo. Nabad-gelyodarrada  ka jirta Hiiraan iyo Muqdisho ayaa ku khasabay in la xiro sayladaha hilibka lagu qalo, taasoo si weyn u dhintay dhoofinta hilibka la qaboojiyo ee laga qaado goobahaas ee la geeyo dalalka Gacanka Carabta. 7dii bilood ee u horreeyey sannadkan  2008, sayladda hilibka lagu qalo ee Burco waxa laga dhoofiyey tiro guud oo ah 96,798 oo neef hilibkoodii, taasoo 217% ka sarraysa hilibkii la dhoofiyay isla muddadaas ee sannadkii 2007 (30,548 oo neef), iyadoo sayladda hilibka lagu qalo ee Gaalkacayana laga dhoofiyey 49,273 oo neef hilibkoodii.

xoolaha


## SUUQYADA IYO GANACSIGA

Sannadkii la soo dhaafay, colaadda iyo xasillooni la'aanta siyaasiga ah ee sii kordhayaa waxay keeneen in si badan loo daabaco Shilinka Soomaaliga, taasoo qayb ahaan sababta u weyni ay tahay in lagu maal geliyo colaadda gudaha ee sii kordhaysa (eeg Qaybta Colaadda Sokeeye). Sidaas darteed, lacagta warqadda ah ee la soo daabacay ayaa lagu hafiyey suuqyada, taasoo degdeg u kordhisay lacagta suuqyada ku jirta, isla markaana keentay in si xun uu u qiima dhaco Shilinka Soomaaliga , oo gaaray heerarkii sarrifka lacagta ee ugu hooseeyey ee la diiwaan geliyey – qiime dhacaasi wuxuu u dhigan yahay 165% tan iyo bishii 1aad ee sannadkii 2007 (Jaantusta 9). Tan iyo bishii 1aad ee sannadkan, Shilinka Soomaaliga waxa ku dhacay qiime dhac dheeraad ah oo ka dhigan 50-65%. Waxa sidan ka duwan, Shilinka Soomaalilaand oo weli ku wada inuu xasilloon yahay, inkastoo uu xooga qiime dhacay isagoo ka soo dhacay ShSL6,000 marka loo eego Doolarka Maraykanka noqdayna ShSL 6,228 bishii 7aad, qiime dhacaas oo ka dhigan 4%.

Jaantusta 9: Isbeddellada Heerarka Sarrifka Lacagta - ShSo iyo ShSl oo lagu beddelanyo Doolarka Maraykanka



Jaantusta 10: Isbeddellada Qiimaha Badeecadda Dibedda Laga Keeno ee Shabeellooyinka oo loo eegayo Heerka Sarrifka Lacagta



Ganacsiga, isgaarsiinta gaadiidka iyo howlaha dhaqaalaha ayaa iyaguna si weyn u qasmay suuqyada koonfurta iyo goollada dhexe iyo dekadaha colaadaha sokeeye ka jiraan.. Magaalada Muqdisho, oo ka mid ah goobaha bar-tilmaameedka u ah nabad gelyo-darrada isla markaana ah goob muhiim ah oo ganacsiga la sii mariyo iyo xarun ganacsiga dhaqaalaha oo u adeegta koonfurta iyo gobollada dhexe oo weli ganacsigu badi xiran yahay.

Waxa intaas dheer, colaadda sokeeye ee sii kordhaysa, burcadnimada maraakiibta badda ee la soo cusboonaysiiyey, cashuuraha dekedaha oo sii kordhay, iyo Shililinka Soomaaliga oo qiime dhacay (oo ka qaali ka dhigaya badeecadda dibedda laga keeno), heerarka badeecadda dibedda laga keena way ka hooseeysaa , cuntada dibedda laga keeno sida bariiska, sonkorta, saliidda wax lagu karsado iyo daqiiqda. . Dalagga dibedda laga keenay bishii 1aad ilaa bishii 7aad ee sannadkan waxa lagu qiyaasay 150,000 MT, 22% ayaanay ka hoosaysaa ceceliska saddex sano ee muddadaas. Dalagga dibedda laga keenaa muhiim ayuu u yahay Soomaalida dalageeda guud., maddaama Soomaaliga dallagga ay dibedda ka keenaan caadi ahaan ka dhigan yahay 60% baahida dalagga ee dalkaas.

Saamaynta arrimaha is biirsaday ee dalagga dibedda laga keeno ee hooseeya, qiimaha cuntada iyo shiidaalka oo caalamiga ah oo sarreeya, qiimaha Isku bedelashada iyo gaadiidka badeecadda ee qasmay isla markaana qaaliga ah iyo qiime dhaca sii socda ee Shilinka Soomaaligu waxay sii kordhinayaan sicir bararka sare ee qiimaha cuntada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka (Jaantusta X iyo Sanduuqa 7). Qiimaha bariisku si weyn ayuu u kordhay dhammaan suuqyada. Tusaale ahaan, suuqa ugu weyn Marka oo ah Shabeellada Hoose, qiimaha bariisku wuxuu kordhay 229%, isagoo ka kordhay ShSo 13,000/kg bishii 1aad ee 2008 noqdayna ShSo 42,750/kg bishii 7aad ee 2008 (Eeg Shaxda 1). Magaalada Dhuusamareeb ee ku taalla gobollada dhexe ee Soomaaliya, qiimaha bariisku wuxuu kordhay 167%, isagoo ka kacay ShSo 18,000/kg noqdayna ShSo 48,000/kg isla muddadaas. Isbeddello kuwan la mid ah ayaa lagu arkay magaalooyinka Afmadow, Baydhaba, Baardeere, Jowhar, Belet Weyne, iyo Gaalkacayo.

Suuqyada waqooyiga ee Ceerigaabo iyo Burco, qiimaha bariisku wuxuu kacay 221% iyo 141%, siday u kala horreeyaan bishii 1aad ilaa bishii 7aad ee 2008. Marka la barbar dhigo isla muddadaas ee sannadkii la soo dhaafay, qiimaha bariisku wuxuu noqday in ka badan saddex laab badi suuqyada koonfurta, iyo waqooyigaba. Qiimaha badeecadda dibedda laga keeno ee sida sonkorta, daqiiqda iyo saliidda wax lagu karsado wuxuu kordhay qiyaas taan hore u soo sheegnay.. Qiimaha shiidaalku weli wuu sarreeyey bishii 7aad, isagoo u dhexeeyey ShSo 30,000 ilaa ShSo 45,000 litirkii badi suuqyada koonfurta.

Sanduuqa 7: Boqolkiiba Qiimaha Kordhay bishii 1aad ilaa bishii 7aad ee 2008

| Goobaha | Bariis | Sonkor | Shidaal | % Qiimo dhaca Sosh |
|---|---|---|---|---|
| Juba | 224% | 107% | 88% | 61% |
| Shabelle | 225% | 82% | 71% | 51% |
| Dhulka Mesegada sida aadkaa looga beerto | 229% | 124% | 84% | 56% |
| Gobollada Dhexe | 191% | 92% | 97% | 63% |
| Moqdisho | 143% | 76% | 60% | 51% |
| Waqooyi Bari | 231% | 100% | 106% | 65% |
| Waqooyi Galbeed | 99% | 13% | 29% | 4% |


## GUUD-MAR NAFOQADA AH

Falanqayn guud oo lagu sameeyey xogaha [1] nafaqada ee la soo uruuriyey bishii 1aad ilaa bishii 7aad wuxuu muujinayaa xaaladdo nafaqo oo kala duwan dhammaan dalka (Eeg khariidadaha hoos ku yaalla). Colaadda sokeeye iyo mucaaridka siyaasadeed ee ka jira Muqdisho iyo badi gobollada koonfurta iyo Goboladda dhexe, saamaynta barakaca dadka ee sii socda ee u qaxaya gobollada deriska ah iyo xaaladaha abaarta ee ka jira qaybo ka tirsan koonfurta, gobollada dhexe, waqooyi-galbeed iyo waqooyi-bari waxa weeye arrimaha ugu waaweyn ee doorka ka ciyaaraya falanqaynta hadda. Waxa intaas dheer, sicir bararka qiimaha cuntada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ee ka jira dhammaan dalku wuxuu abuurayaa dhibaatooyin la xiriira fursad-u-helidda cuntada ee dadka deggan magaalooyinka gaar ahaan dadka saboolka ah. , iyadoo cudurro iyo qaababka daryeelka carruurta oo liitaa ay ka dambeeyaan xaaladda nafaqo ee aan fiicnayn ee ka jirta badi dadka Soomaalida ee deggan dhulka miyiga..


19 qiimaynood oo nafaqada ah oo goobo badan matalaya ayay FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan ka sameeyeen ilaa sannadkan 2008, iyo mid ay samaysay hay'adda ACF. 20kaas qiimaynood, 4 waxay sheegeen heerar nafaq-darro guud oo xun [2] (GAM) oo ka yar 15%, 8 waxay sheegeen heerar ah 15-20% iyadoo 8da harayna ay sheegeen heerar ka badan 20%. Heerka dhexe ee nafaqo-darrada xun ah ee u dhexeeya dhammaan 20ka qiimaynood wuxuu ahaa 18.6%, heerkaas oo ka kordhay 15.7% qiimaynihii ugu dambeeyey ee kuwan la barbar dhigi karo. Heerarka nafaqo-darrada aadka u xuni weli way sarreeyaan qaybo badan oo dalka ah, iyadoo heerka u dhexeeyaa dhammaan 20 baaritaan uu ayahay 2.5%. Hase yeeshee , heerarka dhimashada ee guud iyo kuwa dhimashada carruurta ay da'doodu ka yartahay shan sano weli waxay ku waddaa inay ka hooseeyaan heerarka gurmadka ee dhimashada guud oo ah 2 iyo tan carruurta shan sano ka yar oo ah 4, 10,000 ee qofba maalintii. Iyadoo ku salaysan falanqaynta isku xiran ee la sameeyey (tix raac sanduuqa 13 bogga 18 si aad u hesho qooydaynta F**eejignaan, darran, Halis ah, iyo Aad Halis u ah**) natiijooyinka iyo sida loo isticmaalay heerarka u dhexeeya baaritaannada , (ee tixaaracaya *NCHS WHZ*) carruur ay tiradoodu ku dhowdahay 180,000 ayaa lagu qiyaasay inay nafaqa-darro xumi ku hayso koonfurta, gobollada dhexe ee Soomaaliya iyo dadka ku barokacsan waqooyiga. Isku darka carruurta ay nafaqa-darradu hayso, 26,000 ka mid ah ayaa lagu qiyaasay inay nafaqa-darro aad u xumi hayso. Kala bar ka mid ah carruurtaasi waxay joogaan Shabeellooyinka iyo gobollada dhexe. Natiijooyinka muhiimka ah oo la soo koobay ayaa hoos lagu soo bandhigay, iyadoo ay la socoto falanqan heer gobol iyo heer hab-nololeed ah oo ku jira warbixintan.

**Koonfurta iyo gobollada dhexe:** Xaaladda nafaqo-darrada **Halista ah** ee ka jira koonfurta iyo gobollada dhexe waxa keenay arrimo isbiirsaday oo naxdin leh oo ay ku jiraan colaadda sokeeye, xiisadda siyaasadeed, sicir bararka iyo abaarta, oo keenay in hab-noloeedyadu ay lumaan iyo in dad tiro badani ay ku barokacaan gobollada gudahooda, dadkaas oo culays ku haya khayraadka kooban (biyaha, daaqa, cuntada iyo daryeelka caafimaadka). Howlaha bina'aadamnimada ayaa iyaguna yaraaday colaaddaha sokeeye iyo mucaaridka siyaasadeed dartood, taasoo sii xaddidaysa fursad-u-helidda waxyaabaha lagama maarmaanka ah. Natiijooyinka muhiimka oo kooban ayaa hoos ku taxan:
Falanqayntan: walaaca ugu weyn waxa laga qabaa dhulka miyiga oo ka sii daraya oo qaybo ka tirsan koonfurta, gaar ahaan gobollada Bakool iyo Gedo, oo heerarka nafaqa daradda ee guud (GAM) ay yihiin **24.1%** iyo **25.5%,** xoola-dhaqatada iyo beero-iyo-xoola-dhaqatada Bakool, siday u kala horreeyaan, Waajid waxa weeye **22.3%,** Xoola-dhaqatada iyo dhulka webiyada ee Gedo, siday u kala horreeyaan waa **23.3%** iyo **21.5%**, goobahaasi dhammaan aad ayay uga sarreeyaan heerarka gurmadka[3] oo ah 15% waxana ay muujinayaan xaalad nafaqo oo **aad Halis u ah.**

Khariidadda 8: Xaaladda Nafaqada ee Soomaaliya oo la Qiyaasay, Bishii 1aad ee 2008




Khariidadda 9: Xaaladda Nafaqada ee Soomaaliya oo la Qiyaasay, Bishii 8aad ee 2008



Xaalad nafaqo darro oo **aad Halis u ah** ayaa laga soo sheegay inay ka jirto dadka ku barakacsan Gaalkacayo iyo Garowe oo heerarkooda GAM ay yihiin **21.1%** iyo **22.6%,** siday u kala horreeyaan.Sidoo kale xaaladda  nafaqo oo **halis ah** oo sii socota ayaa ka jirta gobollada dhexe, taasoo ku salaysan natiijooyinkii ka soo baxay qiimayno laga sameeyey xoola-dhaqatada Hawd iyo Cadduun, hase yeeshee waxa walaac laga qabaa tilmaameyaal kale oo muujinaya in xaaladu laga yaabo inay ka sii dari doonto.



Hooyo iyo Ilmaheedii, Xero Dadka Soo Barkacay ay Degganyihiin oo Shebeellooyinka ah, Bishii 7aad ee 2008

Xaaladda gobollada Shabeellooyinka[4] oo ay ku jiraan dadka ku barakacsan Afgooye iyo Marka waxay muujinayaan heerar **halis ah** iyadoo ay sii socdaan heerar aad u sarreeya oo ah nafaqa-darro aad u xun (SAM) oo ka jira dadka deggan dhulka miyiga heerarkaas oo ka sarreeya 3%. Heer SAM ah oo ka hooseeya 1% ayaa laga soo sheegay dadka goobahaas ku barakacsan, taasoo laga yaabo inay xiriir la leedahay fursad-u-helidda wax qabadyada bina'aadamnimo. Xaaladda nafaqadu way ka sii dartay hab-nololeedka beero-iyo-xoola-dhaqatada ee  Jubbooyinka iyadoo iska beddashay sidii ay ahayd Deyrtii 2007/8 kadib oo ahayd xaalad Adag, noqotaynay Halis, iyadoo heerka GAM ee la diiwaangeliyey uu yahay 19.5%.[5]

**Gobollada Waqooyiga**

Waqooyi-galbeed, xaaladda nafaqadu aad ayay uga sii dirtay iydoo iska beddeshay siday ahayd bishii 1aad ee 2008 (Deyrtii 2007/8 kadib)oo ahayd Feejignaan noqotayna **Halis** dhammaan hab-nololeedyada *(Eeg Khariidadda 4 ee ku dhigan dhinaca dambe ee boggan)* waxa ka reebban dadweynaha Dooxada Nugaal ee beero-iyo-xoola-dhaqatada oo ku jira xaalad **Adag**, xoola-dhaqatada Galbeedka Golis iminka waxay ku jiraan **Feejignaan** sii socota.. Dadka ku barakacsan waqooyi-galbeed, xaaladdooda nafaqadu iyana way ka sii daraysaa, iyadoo xaaladda dadka ku barakacsan Hargeisa ay iska beddeshay xaalad darran  oo ay noqotay **Halis,** xaaladda dadka ku barakacsan Berbera iy Burco oo Derytii 2007/8 kadib ahay waxa weeye heerar **aad Halis u ah**.  Tani waxa laga yaabaa inay ku xiran tahay culayska sii kordhaya ee saaran qoysaska saboolka ah ee la xiriira fursad-u-heliddooda cuntada magalooyinka oo qiimaha cuntadu uu  sarreeyo.



*Biya galeen ku yaalla Hiiraan, G'ugii 2008*

Waqooyi-galbeed, xaaladda nafaqada ee xoola-dhaqatada bannaanka Sool iyo Karkaar-Dharoor waxay ku jiraan xaalad ah **Feejignaan** oo sii socota, iyadoo dadka xeebta Deexna ay soo food saartay xaalad **Adag** oo sii socota. Hase yeeshee, xaaladda Dooxada Nugaal, Gaagaab, iyo Bariga Golis waxay iska beddeshay siday ahayd bishii 1aad ee 2008 oo ahayd Feejignaan waxanay  noqotay xaalad daran **.** Arrimaha ugu waaweyn ee  doorka ka ciyaaraya xaaladda nafaqo ee ka sii daraysaa waxa weeye abaarta ka soo shaac baxaysa dhulka xoola-dhaqatada iyo sicir-bararka aadka u sarreeya ee keenaya in qiimaha cuntadu uu sii kordho.

***Falanqaynta Nafaqada Magaalooyinka***

Qiimayno nafaqada ah oo degdeg ah ayaa iyana laga sameeyey  73 magaalo iyo deegaan oo ka tirsan Soomaaliya bishii 7aad 2008 iyadoo isku darka tirada carruurta la qiimeeyey ay ahaayeen 8,864 canug (6-59 bilood ) iyadoo la isticmaalay cabirka wareegga cududda.  Falanqaynta natiijooyinku waxay muujinaysaa xaalad walaac lihi inay ka jirto magaalooyin badan, inkasta  goobaha qiimaynta lagu sameeyey aanay meelo badan matalin, natiijooyinka laguma daabicin halkan. Hase yeeshee, warku waxa loo isticmaalay hal tilmaame oo qayb ka ah falanqaynta guud ee isku xidhan ee nafaqada iyo hubinta cuntada ee xaaladda magaalooyinka taasoo lagu soo bandhigi doono Warbixinta Hubinta Cuntada iyo Nafaqada ee FSAU.

---

1.Falanqaynta waxa lagu sameeyey warar kala duwan oo nafaqada ah oo la soo uruuriyey bishii 1aad ilaa bishii 7aad ee 2008 oo ay ku jiraan 20 baadhitaan  (19 ay sameeyeen FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan, iyo, 1(Hal)  ay samaysay ACF between April – July 2008), 81 xarummo caafimaad ah, qiimayn degdeg ah oo cabirka wareegga cududda  oo laga sameeyey 315 barood  (waqooyi-galbeed:  147, waqooyi-bari: 27, gobollada dhexe iyo Hiiraan: 72, Baay/Bakool: 9, Gedo: 55, Jubbooyinka: 5), xogta laga soo qaatay hay'adaha la isbahaysto ee xarumaha quudinta iyo nafaqaynta, Warbixinaha Shuban Biyoodka ee WHO  iyo xog kale oo la soo xigtay.

2. Natiijooyinka ugu muhiimsan ee baadhitaannada  natiijooyin la soo  sheegay iyadoo la isticmaalayo tixraacyada WHO 2005 ayaa iyana   la soo bandhigay, heerarku waxay la socdaan tixraacyada NCHS ee 1977. Hase yeeshee lagu soo bandhigay sanduuqyada  warbixinaha   heer gobol.


# ARRIMAHA UGU MUHIIMSAN GOBOLLADA

## GOBOLLADA KOONFURTA

***Gobollada Shabeellooyinka***

Dadweynaha gobollada Shabeellooyinku waxay ku wadaan inay ku jiraan xaalada ah **Gurmad Bini'aadamnimo(GB)** iyo **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** oo ay la socoto heer digniin hore ah oo **Ilaalin ah** lixda bilood ee soo socota. Qiimayn dhowaan magaalooyinka lagu sameeyey, tiro badan oo ah dadweynaha magaalooyinka ee gobollada Shabeellooyinka ayaa iyana lagu tilmaamay inay ku jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** (95,000 qof) **Gurmad Bina-aadamnimo** (15,000 oo qof) oo ay la socoto digniin hore oo heer **Ilaalin ah**. Iminka, ilaa 585,000 oo ah dadka dhulka webiyada, beero-iyo-xoola-dhaqato, xoola-dhaqato iyo dad deggan magaalooyinka ayaa ku jira xaalado ah **GB** ama **XCHAX** waxana ay u baahan yihiin gargaar bina'aadamnimo (Sanduuqa 1). Dadkaas 265,000 oo qof waxay ku jiraan **GB,** 320,000 oo qofna waxay ku jiraan **XCHAX**, taasoo ka dhigtay in tirada dadka saamoobay ay korodhay 35% tan iyo bishii 4aad ee 2008. Xaaladdan sii xumaatay waxa keenay roobabkii Gu'ga 2008 oo dib u dhacay isla markaana liitay; sidaas darteed, waxa dhacday in xilli kale soo saarka miruhu/firridu uu ka hooseeyey caadi; kharashka la geliyo (shidaalka) beeraha oo sarreyey; seeraha oo gabaabsi noqday; iyo sicir barar sii socda, oo aad u dhimay awoodda wax iibsiga. Intaas waxa dheer, colaadda sokeeye ee sii socota waxay keentay barakaca dad badan, taasoo culays dheeraad ah saaraysa khayraadka ama adeegyada gobolladaas ee horeba u adkaa.

Jaantusta 11: Isbeddeladda Heerka Gobol ee Qiimaha Gallayda ee Shabeellooyinka




Hab-nololeedka Webiyada, roobab caadi ka hooseeya oo ay weheliyaan kharashka beeraha la geliyo oo aad u sarreeya ayaa keenay in soosaarka dalaggu uu aad u hooseeeyo. Gobolka Shabeellada Dhexe, soosaarka dalagga waxa lagu qiyaasay inuu yahay 44% iyo 46% (oo uu ku jiro bariis) ee celceliska dagaalka ka dib ee Gu'ga iyo celceliska shan sano ee Gu'ga (2003-2007), siday u kala horreeyaan; gobolka Shabeellada Hoose waa 52% iyo 61% celceliska dagaalka kadib isku celceliska 5 sano, siday u kala horreeyaan. Badi dhulka webiyada iyo hab-nololeedka beero-iyo-xoola-dhaqatada, dhowr xilli oo uu soosaarka dalaggu ka hooseeyey caadi iyo mashaariicda beeraha oo gabaabsi noqotay (badi gobolka Shabeellada Dhexe) ayaa ah arrimaha u waaweyn iminka ee keenaya keydka hoose ee cuntada iyo saadka suuqyada ee kooban, taasoo horseeday in qiimaha gallaydu uu gaaray heerkii ugu sarreeyey ee la diiwaan-geliyo (qiyaastii 200% iyo 400% ayuu sarreeyaa marka loo eego siduu ahaa bishii 1aad ee 2008 iyo bishii 7aad ee 2007, siday u kala horreeyaan). Arrimahaas oo ay weheliyaan helitaanka shaqada oo kooban, waxay si weyn u mija-xaabiyeen awoodda wax iibsiga ee dadka saboolka ah ee dhulka webiyada iyo beero-iyo-xoola-dhaqatada, gaar ahaan qoysaska gobolka Shabeellada Dhexe. Hoos u dhacan awoodda wax iibsiga waxa caddaynaysa iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeye dalagga iyo shaqada oo hoos u dhacay 50-60% tan iyo bishii 1aad ee 2008 (Suuqa Jowhar). Heerka iswaydaarsiga ee ka dhexeeya dalagga iyo rida daabaxa (oo qiyaas ka bixisa awoodda wax iibsiga ee saboolka xoola-dhaqatada iyo beero-iyo-xoola-dhaqatada) 40% iyo 50% ayuu ka hooseeyaa siduu ahaa bishii 1aad ee 2008 iyo bishii 7aad ee 2007, siday u kala horreeyaan. Cuntada iyo waxyaabaha kale ee dibedda laga keeno qiimahoodu waxaa lagu wadaa inuu sii kordhayo, iyadoo qiimaha sonkorta, saliidda wax lagu karsado iyo shidaalku uu laban laabmay tan iyo bishii 1aad ee 2008. Guud ahaan arrimahaasi waxay ku wadaan inay si xun u taabanayaan cuntada iyo ilaha dakhliga, iyo xaaladda nafaqada ee qaybo badan oo ka tirsan dadweynaha gobollada Shabeellooyinka.

Xaaladda nafaqada ee beero-iyo-xoola-dhaqatada gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe waxay ku waddaa inay ku adkaysanayo xaalad **Halis ah**, iyadoo dadka dhulka webiyaduna ay weli ku jiraan xaalad nafaqo oo **Adag**, taasoo muujinaysa inay waxba is beddelin taniyo Deyrtii 2007/8. Dadka dhulka webiyadu waxay fursad wanaagsan u helaan kalluun, khudradda macaan, khudradda cagaaran marka loo eego dadka beero-iyo-xoola-dhaqatada ah. Arrintan iyo waxqabadyo ay sameeyeen hay'adaha bani'aadamnimadu ayaa sharax ka bixinaya xaaladaha nafaqada ee dadka dhulka webiyada ee ka wanaagsan kuwa kale. Dadka ku barakacsan Afgooyi/Merka iminka waxay ku jiraan xaalad **Halis ah**. Wax qabadyada bina'aadamnimadu qayb ahaan waxay wax ka tareen xaalad ka sii daraysay oo ay ku jireen dadka goobahaas ku barakacsani, dadkaas oo ku wada inay dhibaatooyin ka soo gaarayaan colaadda sokeeye, qiimaha cuntada ee sii kordhaya, iyo natiijada arrimahaas ka timi ee ah heerarka cudurrada oo sarreeya. Magaalada Muqdisho, xaaladda nafaqadu **aad ayay Halis u tahay**. Qoondayntani waxay ku salaysan tahay falanqayn isku xiran oo lagu sameeyey caddaynta natiijooyinka muhiimka ah, oo ay ku jiraan qiimayno nafaqada ah oo degdeg ah oo FSAU ay ku samaysay 12 goobood bishii 7aad ee 2008 (N-1293), taasoo muujinaysa tiro sare oo carruurta la qiimeeyey ka tirsan (21%) in lagu sameeyey cabbirka wareegga cududda (<12.5/caga barar); xogta Qaababka Warka Caafimaadka (QWC)ee laga soo qaato xarrumaha caafimaadka, oo si joogto ah u muujinaya tiro badan muddada bishii 4aad – bishii 6aad ee 2008 (Waxa laga soo qaatay: xogta QWC ee bishii 1aad-bishii 6aad ee 2008). Bishii 6aad ee 2008, cusbitaalka Banaadir waxa la geeyey tiro badan, 211 dhacdo oo shuban biyood ah oo ka tirsan gobolkaas, oo 6 ka mid ahi ay u geeriyoodeen cudurkaas (waxa laga soo qaatay: Warbixinta Qaybta Caafimaadka ee Soomaaliya, Bishii 6aad ee 2008); Hase yeeshee fiditaanka cudurkan waa la xakameeyey.


**Gobollada Baay iyo Bakool**

Xaaladda hubinta cuntada ee hab-nololeedyada gobollada Baay iyo Bakool way kala duwan tahay. Xaaladda Bakool way ka sii dartay marka la eego dhammaan hab-nololeedyada, oo ay ku jiraan saboolka magaalooyinku tan iyo Gugii 2007. Qiyaastii 145,000 oo ah beero-iyo-xoola-dhaqato iyo xoola-dhaqato oo gobolkaas ka tirsan ayaa iminka ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** ama **Gurmad Bina'aadamnimo (GB)**. Waxa intaas dheer, isku dar dhan 25,000 oo ah saboolka magaalooyinka ayaa iyana iminka ku jira xaalad ah **XCHAX.** Roobabka oo liitay dhammaan hab-nololeedyadu waxay keeneen inaan lagu guulaysan gebi ahaan soosaarka miraha/firrida (5% celceliska dagaalka kadib); in si xun ay uga sii dartay xaaladda daaqa iyo dhirtu; biyaha oo aad u yar; tirada xoolaha oo hoos u

dhacday laga billaabo bishii 12aad 2007; 19% geela, 31% lo'da, iyo 17% adhiga; tiro badan oo xoolo ah oo loola guuray gobollada Baay iyo Shabeellada Hoose; iyo soosaaarka caanaha oo hooseeya. Heerarka sekada ee lagu bixiyo deeq dalag ahi aad ayay hoos ugu dhacday miraha/firrida lagu guulaysan waayay darteed.

Hubinta cuntada ee ka sii dartay waxa kale oo u sabab ah qiimaha dalagga gudaha iyo badeecadda dibedda laga keeno oo aad u kordhay, iyo weliba jiilaalka 2008 oo adkaa, oo sii xumeeyey saamaynta xilliyadii hore ee isxigay ee roobabku ay ka hooseeyeen caadi. Qiimaha haruurka/meseggada ee suuqyada Xuddur ee Bakool bishii 7aad ee 2008 wuxuu kordhay in ka badan 400% marka loo eego qiimihii bishii 7aad ee 2007 (isagoo ka kacay 3,000/kg noqdayna 15,350/kg) 270% ayaanu ka sarreeyaa qiimuhu siduu ahaa bishii 1aad ee 2008 (4,125/kg). Qiimaha dalagga waxa la filayaa inuu ku wadi doono inuu sii kordho miraha/firridda sida buuxda loogu guul darraystay, kaydka miraha ee aadka u hooseeya iyo saadka dalagga suuqyada ee hooseeya dartood. Marka la eego ganacsiga xoolaha, la'aanta daaq wanaagsani waxay keentay in xaaladda jirka xooluhu ay liidato. Tusaale ahaan, qiimaha rida daabaxa ahi hoos ayuu u dhacay intii u dhaxaysay bishii 4aad iyo bishii 7aad ee 2008 (isagoo hoos uga soo dhacay 575,000ShSo noqdayna 437,500ShSo); qiimaha xooluhu waxa la filayaa inuu hoos u sii dhici doono saddexda bilood ee soo socota. Waxa kale oo door ka ciyaaraya qiimaha xoolaha ee dhacaya, tirada sii kordhaysa ee xoolaha suuqyada loo iib gaynayo sababtoo ah awoodda wax iibsiga ee qoysaska saboolka ah ee Bakool ee hoos u sii dhacaysa, waxay billaabeen inay xoolahooda iibiyaan, oo ay ku jiraan xoolaha dhalmada loo haysto, si ay ugu adkaystaan sicir barbarka sare, taasoo keeni doonta in tirada xooluhu ay hoos uga marto heerka caadiga ah.

**Khariidadda 10: Khariidadda Qooyndaynta Xaaladaha ee Isku xiran ee Soomaaliya, saadaasha dadka deggan magaalooyinka iyo dadka Gudaha ku barakacsan, Bisha 7aad-Bisha 12aad ee 2008**




Waxa laga soo qaatay:: FSAU, July 2008

Waxa sidan aad uga duwan xaaladda hubinta cuntada ee gobolka Baay. Soosaarka dalagga oo caadi ahaa Guga 2008 (93% celceliska dagaalka ka dib) xaaladda hubinta cuntada ee beero-iyo-xoola-dhaqatada Beerdaal iyo Mowlimaad hore ayay u martay, sidaas darteed xaaladooddu way ka soo degtay **GB** waxana ay noqotay **XCHAX**. Isku darka tirada dadka deggan dhulka miyiga ah ee Baay ee ku jiraan **XCHAX** waa 15,000; badidoodu waxay joogaan degmada Baydhaba. Dadka deggan dhulka miyiga ah ee ka baxsan degmada baydhaba waxa lagu tilmaamay in Hubintooda Cuntadu aanay Caddayn. Marka la eego dadka magaalooyinka ee Baay, xaaladdooda cunto xoogaa ayay ka sii dartay. Isku darka tirada dadka magaalooyinka ee Baay ee ku jira **XCHAX** iminka waxa weeye ilaa 35,000.

Roobabkii Guga 2008 ee caadiga ahaa ee ka da'ay badi gobolkaas waxay keeneen soosaar dalagga ah oo caadi ah, helitaanka biyaha, daaqa iyo dhirta oo fiicnaaday iyo guud ahaan xaaladda iyo soosaarka xoolaha oo hore u maray. Kaydka dalagga waxa la filayaa inuu hayo lix ilaa siddeed bilood, taasoo ku xiran inta uu qoysku la'eg yahay iyo heerka soosaarka ee qoyska. Arrintan waxa u sabab ah soosaarka dalagga oo wanaagsan saddex ka mid ah afartii xilli ee u dambeeyey (Gugii 2008: 93% celceliska dagaalka kadib, Deyrtii 2007/8: 129%; iyo Deyrtii2006/7: 228%). Soosaarka dalagga oo caadi ahaa iyo qiimaha xoolaha oo korreeya waxay hore u mariyeen heerarka dakhliga ee qoysaska beero-iyo-xoola-dhaqatada ah ee gobolka Bay. Fursadaha shaqada beeraha, inay dadku iskood u shaqaystaan iyo iibka caanuhu iyana waa caadi. Sida ay sheegaysay warbixinta xogta suuqyada ee FSAU ee bishii 8aad ee 2008, qiimaha haruurka/meseggada ee bishii 7aad ee 2008 ee Baydhaba 457% ayuu ka sarreeyey qiimihii bishii 7aad ee 2007, qiimihii bishii 1aad ee 2008 wuxuu ka sarreeyey 279%; tan waxa u sabab ah sicir bararka sare, qiime dhaca Shilinka Soomaaliya iyo hoos u dhaca dalabka dalagga ee gobollada deriska ah. Qiimaba haruurka/meseggadu waxa la filayaa inuu kordhi doono inta lagu jiro shanta bilood ee soo socota. Qiimaha xoolahana waxa la filayaa inuu kordhi doonoo gobolka Baay, xaaladaha jirka xoolaha oo wanaagsan dartood.

Saddex qiimaynood oo nafaqada ah oo dhowaan laga sameeyey hab-nololeedyada beero-iyo-xoola-dhaqatada iyo xoola-dhaqatada Bakool waxay sheegeen heerar nafaqa-darro oo **aad Halis u ah** iyadoo ay xaaladdu ka sii dartay sidii laga soo sheegay Deyrtii 2007/8 kadib ee xaalad Halis ah ama Adag. Xaaladda sii xumaanaysa waxa laga yaabaa inay keeneen fursad-u-helidda caanaha oo hoos u dhacday, cudurrada oo kordhay iyo qaababka daryeelka carruurta oo aan fiicnayn iyo xaalado la xiriira hubinta cuntada. Xogta Qaababka Warka Caafimaadka ee Baay, waxay muujinaysaa heerar sare oo sii kordhaya oo ah carruur ay nafaqa-darro xumi hayso. Waxa intaas dheer, waxa korortay tirada carruurta ay nafaqo-darro hayso ee la geeyey barnaamijyada taageerada nafoqada lixdii bilood ee la soo dhaafay.

**Gobollada Jubbada Hoose iyo Dhexe**

Xaaladda hubinta cuntada iyo hab-nololeedka ee gobollada Jubbooyinku way kala duwan tahay. Iminka, xaaladda hubinta cuntada ee Jubbada Dhexe waxaa lagu waddaa inay ka sii daraysay iyadoo 36,000 oo qof oo ah dadka deggan dhulka miyiga ah iyo 25,000 oo ah dadka magaalooyinku ay ku jiraan xaalad ah **XCHAX**. Waxa intaas dheer, dad ku dhow 7,000 oo qof badidoodu deggan Bu'aale, Jilib iyo dhulka webiyada ee Saakow, oo hore lagu tilmaamay inay ku jiraan **XCHAX** ayaa iminka ku jira **GB**. Roobabkii Gu'ga 2008 oo liitay hab-nololeedyada dhulka webiyada iyo beero-iyo-xoola-dhaqatadu waxay keentay in soosaarka dalagga oo hooseeya (28% celceliska dagaalka kadib); xaaladaha daaqa oo liita, tirada geela oo xoogaa hoos u dhacday (6%), tirada ariga oo hoos u dhacday (2%), laakiin tirada lo'da ayaa in yar sare u kacday (6%) tan iyo bishii 12aad ee 2007; caanaha oo hooseeya; sakada oo hoos u dhacday; iyo fursadaha shaqada oo yaraaday, arrimahaas oo dhammaan door ka ciyaaraya inay aad hoos ugu dhacday awoodda wax iibsiga ee qoysaska saboolka ah ee goobahaas. Xaaladda hubinta cuntada ee ka sii dartay waxa kale oo u sabab ah qiimaha aadka u kordhay ee dalagga gudaha iyo ka dibedduba. Tusaale ahaan qiimaha gallayda ee Bu'aale aad ayuu u kordhay isagoo ka kacay ShSo2,120/kg bishii 7aad ee 2007 noqdayna ShSo16,000/kg bishii 7aad ee 2008, qiime korodhkaasi oo ka dhigan 655% oo 260% ka badan siduu ahaa bishii 1aad ee 2008. Qiimaha dalagga waxa la filayaa inuu ku wadi doono inuu kordho ilaa goynta tan xigta (Deyrta 2008/9).

Xaaladda hubinta cuntada ee Jubbada hoose xoogaa ayay hore u martay sababtoo ah roobabka iyo heerarka wax soo-saarka dalagga oo caadi ahaa, fursadaha shaqada oo kordhay iyo xaaladaha seeraha iyo jirka xoolaha oo fiicnaaday. 13,000 oo qof oo hore ugu jiray GB, iminka waxay ku jiraan **XCHAX**. Tirada dadka deggan dhulka miyiga ah ee ku jira **XCHAX** iminka waa 25,000, tirada dadka magaalooyinka ee ku jira **XCHAX** waxa weeye 45,000. Isku darka soosaarka dalagga ee ka soo baxay Jamaame, oo ah degmada ugu weyn soo-saarka dalaggu, waxa lagu qiyaasay 3,655MT (96% celceliska dagaaalka kadib), Kismaayana waa 780MT (113% celceliska dagaalka kadib). Falanqaynta helitaanka kaydka dalagga ee Jubbada Hoose waxay muujinaysaa in kaydku uu haynayo saddex ilaa shan bilood, taasoo ku xidhan heerarka soosaarka degmada. Inkasta oo soo-saarka dalagga ee guud ahaaneed uu wanaagsan yahay, qiimaha dalaggu aad ayuu u kordhay laga billaabo bishii 7aad ee 2007 ilaa bishii 7aad ee 2008. Qiimaha ugu sarreeya ee gallayda waxa laga diiwaan geliyey Jamaame (ShSo 20,000/kg), kaasoo 1,017% ka sarreeya siduu qiimuhu ahaa bishii 7aad ee 2007, 275% ayaanuu ka sarreeyaa marka loo eego siduu qiimuhu ahaa bishii 1aad ee 2008; qiimaha sare qayb ahaan waxa u sabab ah qiime dhaca sii kordhaya ee Shilinka Soomaaliya. Qiimaha gallayda iyo dalagga kale waxa la filayaa inuu ku wadi doono inuu kordho ilaa Deyrta dambe 2008/9.

Falanqaynta xaaladda nafaqada ee isku xidhan ee Guga 2008 kadib waxay muujinaysaa in xaaladda dadka dhulka webiyadu ay ka fiicnaatay heerar **Halis** ah oo la diiwaangeliyey Deyrtii 2007/8 kadib, iyadoo noqotay xaalad **Adag**. Horumarkan waxa laga yaabaa inay u sabab yihiin fursad-u-helidda khudradda macaan iyo tan cagaaran oo korodhay gaar ahaan, goobo ka tirsan Jubbada Hoose, iyo wax qabadyada bina-aadamnimada ah oo ku aaddan dadka dhulka webiyada. Hase yeeshee xaaladda nafaqada ee bulshada dhulka webiyada ee Jubbada Dhexe waxa laga yaabaa inay ka sii darto xaaladda hubinta cuntada oo sii xumaanaysa darteed, taasoo ugu dambaynta saamayn doonta cuntada ay dadku cunaan.


Dhinaca kale, natiijooyinka ka soo baxay qiimaynihii nafaqada ee FSAU iyo hay'adaha ay isbahaysteen sameeyeen bishii 6aad ee 2008, waxay muujinaysaa heerar **Adag** oo sii socda o ka jira dadka xoola-dhaqatada ah, sidii lagu diiwaangelshay falanqayntii Deyrtii 2007/8 kadib. Xaaladda nafaqo ee **Adag** ee ka sii jirta bulshada xoola-dhaqatada ee gobollada Jubbooyinku waxay xiriir la leedahay fursad-u-helidda caanaha iyo soo-saarka caanaha sida subagga ee sii socda ama dakhliga ka soo galay iibka waxyaabahaas. Xoolo ka guuray gobollada kale ayaa iyana u sabab ah fursad-u-helidda caanaha ee sii korortay gobollada Jubbooyinka.

Dadka beero-iyo-xoola-dhaqatada ah , xaaladooda nafaqo way ka sii dartay iyadoo ka kacday heerar **Adag** oo ay ahayd Deyrtii 2007/8 noqotayna **Halis** Gu'ga 2008. Arrintan waxa u sabab ah fursad-u-helidda cuntada oo yaraatay kadib markii lagu guulaysan waayay roobabka goobaha beero-iyo-xoola-dhaqatada ee Jubbada Hoose Deyrtii 2007/8 iyo iminka oo qaybo ka mid ah goobaha beero-iyo-xoola-dhaqatada ee Jubbada Dhexe aanay helin roobab wanaagsan taasoo keentay in miraha/firrida aan lagu guulaysan, iyo in dakhliga laga helo iibka miraha iyo shaqada beeruhu uu hoos u dhacay. Xaaladda nafaqo ee dadka ku barakacsan magaalada Kismaayo waxaa lagu wadda inay tahay **Halis** ilaa dayrta.

**Gobolka Gedo**

Xaaladda hubinta cuntada ee Gedo iminka way ka sii dartay, miraha/firrida oo lagu guuldarraystay; daaqa oo gabaabsi ah (oo keenay in xoolo badan ay ka guureen gobolkaas); kaydka cuntada oo kooban, iyo qiimaha cuntada ee kordhay dartood, taasoo dib u celinaysa horumarkii weynaa ee xoola-dhaqatada iyo beero-iyo-xoola-dhaqatadu ay gaareen Deyrtii 2007/8. Tirada dadka u baahan gargaar bina'aadamnimo ee jooga gobolka Gedo waxay ka kordheen sidii ay ahaayeen bishii 1aad ee 2008 oo ahayd 45,000, waxana ay gaareen 130,000. Ilaa 20,000 oo qof oo ah dadka dhulka webiyada, beero-iyo-xoola-dhaqatadu iyo xoola-dhaqatada, oo badidoodu jooga waqooyiga Gedo, ayaa ku jira xaalad ah **GB,** iyadoo 110,000 oo qof oo ka tirsan dhammaan hab-nololeedyada oo ay ka tirsan yihiin 30,000 oo ah saboolka magaalooyinku ay ku jiraan xaalad ah **XCHAX.**

Jaantusta 12: Isbeddeladda Heerka Gobol ee ee Qiimaha haruurka ee Baardheere, Gedo




Guud ahaan roobabkii Gu'ga 2008 aad ayay u liiteen marka laga reebo goobaha xoola-dhaqatada ee degmooyinka Ceelwaaq iyo Baardheere, goobahaas oo xaaladaha seeruhu ay soo jiito tiro badan oo xoolo ah oo ka soo guuray gobolka Gedo gudihiisa, Kiinya iyo Itoobiya, xoolahaas oo dhammeeyey khayraadkii daaqa iyo dhirta oo keenay in xoolo badani (geel iyo lo') ay u guuraan gobollada Jubbooyinka. Roobabkii Gu'ga ee liitay dartood, miraha/firrida waa lagu guul darraystay goobaha beero-iyo-xoola-dhaqatada, iyadoo ay mashaariicda waraabintu liitaan, kharashka la geliyo beeruhuna uu sarreeyo arrimahaas oo si weyn u dhimay dhulka miraha laga abuuray. Soo-saarka hadda ee dalagga waxa lagu qiyaasay inuu yahay 15% ee celceliska dagaalka kadib iyo 31% ee celceliska shan sano.

Seeraaha oo aan fiicnayn, xaaladaha jirka xoolaha oo liita, iyo tirada xoolaha oo hoos u dhacday (lo'da iyo ariga) waxay keeneen in fursad u helidda cuntadu iyo dakhligu uu hoos u dhacay hab-nololeedyo badan oo xoola-dhaqato iyo beero-iyo-xoola-dhaqato ah, kuwaas oo heerarka deynta lagu leeyahay ay aad u kordheen oo ay yihiin ilaa $242 qoyskiiba Gu'ga 2008 iyadoo ay dayntu ka korortay $43 qoyskiiba Deyrtii 2007/08. Sicir bararka sii socda, fursad-u-helidda shaqada ee kooban, fursadaha ay dadku iskood ugu shaqaystaan oo kooban, qiimaha cuntada oo aad u korreeya oo si xun u mija xaabinaya awoodda wax iibsiga ee qoysaska saboolka ah ee dhammaan hab-nololeedyada. Qiimaha haruurka/meseggadu ee suuqa Baardheere bisha 7aad ee 2008 in ku dhow shan laab ayuu ka sarreeyey siduu ahaa bishii 1aad ee 2008 (isagoo ka kordhay ShSo2,000 gaarayna ShSo11,500) qiimaha suuqa Luuqna wuxuu noqday in ka badan labanlaab isla muddadaas (isagoo ka kacay ShSo4,500 noqdayna ShSo10,000).

Sida weyn ee uu u kordhay qiimaha dalaggu wuxuu aad u dhimay awoodda wax iibsiga, taasoo si weyn u saamaynaysa qoysaska saboolka. Iswaydaarsiga ganacsiga shaqo lagu beddelanayo dalagga bisha 7aad ee 2008 (suuqa Baardheere) wuxuu hoos uga soo dhacay 22kg/shaqada maalintii bishii 1aad ee 2008 iyo 19kg/shaqada maalintii bishii 7aad ee 2007 waxana ay noqotay ilaa 5kg/shaqada maalintii bishii 7aad ee 2008. Sidoo kale, heerka iswaydaarsiga ee ka dhexeeya rida daabaxa iyo haruurka/meseggadu hoos waxay uga soo dhacday 230-440kg bishii 7aad ee 2007, waxana ay noqotay 100-250kg bishii 1aad ee 2008 markaas kadibna waxay noqotay 62kg keliya bishii 7aad ee 2008.

Falanqaynta isku xiran ee warka qiimaynaha nafaqada ee laga sameeyey Gedo bishii 5aad ee 2008 iyo warka kale ee la soo uruuriyey iyo xogta warka caafimaadku waxay muujinayaa in xaaladda nafaqadu ay guud ahaan ka sii darayso dadka xoola-dhaqatada iyo dhulka webiyada iyadoo ka kacday heerar **Halis** ah oo la diiwaangeliyey deyrtii 2007/8 kadib noqotayna mid **aad Halis u ah** Gu'ga 2008 kadib. Xaaladda sii xumaanaysa qayb ahaan waxa u sabab ah helitaanka iyo fursad-u-helidda cuntada oo keentay in kala duwanaanta cuntadu ay hoos u dhacday. Hase yeeshee, dadka beero-iyo-xoola-dhaqatada, xaaladda nafaqadu waxay ku waddaa inay tahay **Halis** taniyo Deyrtii 2007/8 kadib, laakiin waxa laga yaabaa inay ka sii darto sababtoo ah cuntada ay dadku cunaan iyo kala duwanaanta cuntada oo liita dartood kadib markii miraha/firrida lagu guul darraysatay iyo iyadoo la waayay dakhligii laga heli jiray iibka miraha.

## GOBOLLADA DHEXE

**Gobollada Dhexe**


Xaaladda hubinta cuntada iyo xaaladda guud ee bina-aadamnimada ee ka jirta dhammaan hab-nololeedyada gobollada dhexe way ka sii dareen taniyo deyrtii 2007/8 sababtoo ah roobabka oo si buuxda loogu guul darraysatay xilligii Guga 2008 iyo xilliyo hore oo isxigay oo roobabku ay liiteen, oo sii xumeeyey abaarta. Taniyo bishii 4aad ee 2008, tirada dadka ku **jira Gurmad Bina-aadamnimo (GB)** waxay korodhay 64% iyadoo ka kacday 110,000 noqotayna 180,000. Tirada dadka ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** waxay korortay iyadoo ka kacday125,000 noqotayna 155,000, taasoo ay la socoto heerar digniin hore oo ah llaalin dhammaan hab-nololeedyada.



*Geel aad jidhkiisu u taag daranyahay Hab-nololeedyada Xoola-dhaqatada ee Hawd/Cadduun ee Gobolka Galgadud*

Xaaladda hubinta cuntada ee sida weyn uga sii daraysa waxa keenay arrimo badan oo naxdin leh oo ay ku jiraan roobabka oo ka hooseeyey caadi xilliyo isku xiga oo keenay in miraha lagu guul darraysto iyo biyo yaraan; isweydaarsiga ganacsiga oo hoos u dhacay oo jooga heerkii ugu hooseeyey; iyo daaq oo aan ku fillayn oo keenay in xaaladda jirka xooluhu ay liidato iyo in laga guuray gobolladaas. Helitaanka caanuhu wuu hooseeyaa heerarka dhalmada ee dhammaan noocyada xoolaha oo hooseeyey dartood. Heerka rimidda xoolaha waaweyni waa eber, ariguna wuu hooseeyaa ama waa eber. Marka la eego ganacsiga xoolaha, ma jirto lo' iib geli karta oo la helayaa. Helitaanka ariga iibka geli karaana aad ayuu u hooseeyaa, qiimahooduna wuu kordhay. Qiimaha rida daabaxu bishii 7aad ee 2008 wuxuu kordhay 179% marka la barbar dhigo siduu ahaa bishaas sannadkii la soo dhaafay (wuxuu ahaa 340,667 ShSo/neefkii bishii 7aad ee 2007 waxana uu noqday 610,667/neefkii bishii 7aad ee 2008). Inkastoo qiimaha arigu uu kordhay, dakhliga laga helo iibka xooluhu waxba kama tarin qiimaha sare ee dalagga, taasoo si weyn u wiiqday iswaydaarsiga ganacsiga. Waxa intaas dheer qiimaha xoolaha waxa la filayaa inay hoos u dhaco dhowrka bilood ee soo socda.

Jaantusta 13: Iswaydaariga Ganacsiga ee Gobollada Dhexe - Dalag lagu beddelanayo ri




Qiimaha dalaggu wuxuu joogaa heerkii weligiis ugu sarreeyey waxana la filayaa inuu sii kordho bilaha soo socda. Qiimaha haruurku wuxuu kordhay 481% bishii 7aad ee 2008 marka la barbar dhigo bishii 7aad ee 2007 (4,500 ShSo/kg bishii 7aad ee 2007 isagoo gaaray 21,633/kg bishii 7aad ee 2008). Sidaas darteed, iswaydaarsiga ganacsigu aad ayuu hoos ugu dhacay bishii 7aad ee 2008 marka loo eego bishii 7aad ee 2007 iyo celceliska 5 sano (jaantusta 13). Iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya rida daabaxa ah iyo dalaggu bishii 7aad ee 2008 waxay hoosaysay 61% marka loo eego bishii 7aad ee 2007 (12.62 kg/ri bishii 7aad ee 2008 iyo 32.36 kg/ri bishii 7aad ee 2007), taasoo muujinaysa baaxaa degga ku wada inuu hoos u socdo. Falanqaynta isbeddellada tirada xooluhu waxay muujinaysay in tirada xooluhu ay hoos u dhacayso dhammaan noocyada xoolaha (31%-35% geela, 49%-59% lo'da iyo 42%-48% ariga tan iyo Deyrtii 2007/8). Hoos u dhacaasi waxa


u sabab ah heerarka dhicinta/dhimashada xoolaha  iyo iibiinta xoolaha hantida oo sii kordhay xilligii Jiilaalka ee la soo dhaafay.  Maaddaama dakhliga xoola-dhaqatadu iyo awooddooda wax iibsigu ay ku xiran tahay tayada xoolaha ay haystaan, xaaladda jirka xoolaha ee liidata iyo tirada xoolaha ee hoosaysa waxay si weyn u dhimee  fursad-u-helidda xoola-dhaqatada ee dalagga, sidaas darteedna waxay xaddidayaan awoodda ay ku fulinayaan baahidooda lagama maarmaanka ah.

Falanqaynta xaaladda nafaqada ee isku xiran ee FSAU ee Guga 2008 kadib ee dhammaan hab-nololeedyada, Galgaduud iyo koonfurta Mudug waxay ku jiraan xaalad nafaqo oo **Halis** ah, marka laga reebo xeebta Deex oo xaaladda nafaqadu ay ku waddo inay tahay mid **Adag.** Goobaha xoola-dhaqatada ee  Hawd iyo Cadduun ee gobollada Galgaduud, Hiiraan iyo Mudug waxay sheegeen xaalad nafaqo oo **Halis** ah oo laga yaabo inay ka sii darto sababtoo ah waxa jira tilmaameyaal muujinaya in hubinta cuntadu ay sii xumaanayso. Goobo ka tirsan degmada Dhuusamareeb, oo xaaladda nafaqadu ay ahayd mid **Adag** Deyrtii 2007/8 wax qabadyo hore loo sameeyey dartood, iyana iminka way ka sii dartay oo waxay noqotay **Halis**.  Goobaha beero-iyo-xoola-dhaqatada  (Dhulka Digirta laga beero) ee degmooyinka Ceel Buur, Ceel Dheer iyo Xarardheere, xaaladda nafaqadu iyana way ka sii dartay, iyadoo ka kacday xaalad Adag Deyrtii 2007/8 noqotayna mid **Halis** ah Gugii 2008.

### Gobolka Hiiraan

Xaaladda hubinta cuntada ee Hiiraan way ka sii dartay tan iyo Deyrtii 2007/8. Tirada dadka ku jira xaalad ah **Gurmad Bina'aadamnimo (GB)** ee gobolkaasi aad ayay u korortay, iyadoo ka korortay **25,000** noqotayna **120,000** (tiradaas waxa ku jira dadka reer miyiga, beerallayda iyo reer magaalka), tiradaas korortay waxay ka dhigan tahay **380%**. Tiradada dadka ku jira  **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** iyo **Gurmad Bina'aadamnimo (GB)** way labanlaabantahay tan iyo Deyrtii 2007/8 oo iminka gaartay 205,000, taasoo ka dhigan in ka badan saddex dalool oo laba dalool (69%) dadweynaha reer miyiga a iyo beeralayda, iyadoo ilaa 25% ay ku jiraan **XCHAX,** 44% ay ku jiraaan **GB**. Ka sii daridda  xaaladda hubinta cuntada waxa u sabab ah xilligii shannaad ee xilliyo is xiga oo roobabka lagu guul darraystay, taasoo si xun u qastay hab-nololeedyada Hiiraan.

Jaantusta 14: Isbeddeladda Heerka Gobol ee qiimaha haruurka/meseggada ee Hiiraan




Hab-nololeedka sida ba'ani ay  u saameesay waxa weeye beero-iyo-xoola-dhaqatada oo 66,000 oo qof ay iminka ku jiraan GB 37,000 oo qofna ay ku jiraan **XCHAX**. Waxa ku xiga reer webiga oo 24,000 oo qof ay ku jiraan **GB,** 5,000 oo qofna ay ku jiraan **XCHAX**. Xaaladda bina'aadamnimada ee hab-nololeedyada Hawdka iyo Geel iyo ari - dhaqatada  Koonfureed way kasii  daraysaa tan iyo bishii 1aad ee 2008. Tirada dadka ku jira **GB** waa 19,000 oo qof, iyo 3,000 oo qof oo kale oo ku jira **XCHAX.** Geel iyo ari dhaqatada Koonfureed, oo ah kuwa ugu adkaysi badan abaarta ee gobolkaas, ayaa iminka waxay ku jiraan **XCHAX** kadib markii ay soo mareen dhowr  dhibaato oo ay ku jiraan abaar, colaad sokeeye, ciriiriga suuq xumida, oo keenay in xaaladda hubinta cuntadu ay si ba'an uga sii darto ooy keento in dadkii horey ugu jirayXadka Hubin-la'aan cuntada  ayaa iminka ku sugnaaday **XCHAX** ama **GB.**

Kasii darraanshaha ba'ani ee gobolkaasi waxa u sabab ah sida guud ahaan loogu guul darraystay miraha/firrida, taasoo ka timi roobabkii Gu'ga 2008 ee liitay (50-70% of LTM).  Soosaarka dalagga Gu'ga 2008 ee gobolka Hiiraan, oo badi ka soo baxay dhulka webiyada, wuxuu ahaa 2,000 MT, taasoo ka dhigan 51% celceliska soosaarka dagaalladii ka kadib.  Soosaarka dalagga ee hooseeya dhulka webiyadu waxa badi u sabab ah qoyaan yarida  iyo qiimaha shidaalka oo kordhay, oo  ka sarreeya 333% celceliska shan sano (2003-2007). Qiimaha firida waa kii ugu sarreyey ee weligii lagu arkay koonfurta Soomaaliya.  Bishii 7aad ee 2008, qiimaha haruurka iyo gallaydu wuxuu kordhay 523% iyo 644% siday u kala horreeyaan, marka loo eego celceliska shan sano.  Reer guuraaga gobolkaasi waxay la kulmeen waxyeeladdii roob yarida ee Gu'ga 2008 ee liidatay. Arrimaha sii kordhiyay  in hab-nololeedka reer guuraaga ay sii xumaato waxa ka mid ah biya dhaamiska oo goor hore billaabmay (billowgii bishii 5aad ee 2008); kharashka biya-dhaamiska oo aad u sarreeya; khayraadka  (biyaha iyo daaqa) oo xaddidan ayaa keentay in xooluhu xaasaan ooy tabar darreeyaan; waxay isla markaana yaraysay  tirada xoolaha iib galka ah.

Colaadda sokeeye ee fidday iyo  tirada badan ee  dadka ka soo barakacay Muqdisho iyo Belet Weyne ayaa saameeyey bulshooyinka reer guuraaga iyo beeralayda  Hiiraan, taasoo dhaawacaysa hantidii xadidnayd. Tan waxa lagu xaqiijiyey warbixinihii nafaqada ee bishii 6aad ee 2008 oo muujinaya heerar nafaqa-darro xun oo halis ah dhammaan hab-nololeedyada, iyadoo si weyn xaaladdu uga sii dartay tan iyo Deyrtii 2007/8. Xaaladda nafaqadu dadka ee reer wabiga ee gobolka Hiiraan waxay ku nagaatay  mid **Halis** ah tan iyo Deyrtii 2007/8, meesha goobaha beero-iyo-xoola-dhaqatadu ay muujiyeen kasii darraansho iyadoo hore u ahayd mid **Adag** (Deyrtii 2007/8) waxay noqotay mid **Halis** ah (Gu'ga 2008). Inkasta oo aanay jirin xog ku filan in si cad loo qeexo  xaaladda goobaha reer guuraaga  ee Hiiraan la'aanta baaritaanno dhowaan la sameeyey oo meelo badan matala ama xogta cabirka wareegga cududda darteed, sida ay sheegayaan tilmaameyaasha jira iyo xogta baaritaannada nafaqada ee taariikhiga ahi, xaaladda nafaqadu waxay u badan tahay inay tahay **Halis**.

*Gobolka Jarriban/Mudug: biya dhaamis ayaa ka billaabmay roobabkii Gugiu markii ay istaageen, Bishii 7aad ee 2008*

## GOBOLLADA WAQOOYIGA

**Waqooyi-bari**

Hubinta cuntada iyo xaaladda hab-nololeedka ee xoola-dhaqatada gobollada waqooyi-bari way ka sii dartay tan iyo Deyrtii 2007/8, roobabka xilliga Gu'ga oo liitay, sicir barar iyo suuqyada oo qasmay dartood. Hab-nololeedyada sida ugu xun u saamoobay waa Hawd iyo Nugaal, oo ku jiray Hubin La'aan Cuntada ah oo aan Caddayn oo ay la socoto Ilaalin Deyrtii 2007/8, laakiin iminka way ka sii dartay oo waxay ku jirtaa xaalad ah **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** oo ay la socoto inay halis **Dhexdhexaad** ah ugu jirto inay gasho **Gurmd Bina-aadamnimo (GB).** Hab-nololeedka Sool iyo Cadduun weli waxay ku jiraan Hubin La'aan Cuntada ah oo aan Caddayn; hase yeeshee heerarkii digniinta ee hore waxay iska beddeleen Ilaalin waxaana ay halis dhexdhexaad ah ugu jiraan inay galaan **XCHAX**. Isku darka tirada dadka ku jira **XCHAX** iyo **GB** ee jooga gobolladaBari iyo Nugaal waxa lagu qiyaasay 140,000, tiradaas oo 130,000 ay yihiin bulshooyinka magaalooyinka. Isku darka tirada ee guud 82% waxay ku jiraan **XCHAX** 18% waxay ku jiraan **GB**.

Helitaanka iyo fursad-u-helidda daaqa iyo biyaha ee hab-nololeedka Hawdka ee gobollada Mudug iyo Nugaal weli way liitaan sababtoo ah xilliyo is xigay oo aanay roobabku wanaagsanayn (Deyrtii 2007 iyo Gugii 2008). Berkadaha hab-nololeedka Hawd weli biyo dib umay gelin, taasoo keenaysa in barkadaha qaar ay gunta ka dillaaceen, iyagoo ugu dambaysta waayay awoodda ay biyaha ku celinayaan. Biya yaraanta darteed, dalabka iyo qiimaha biyhu way kordheen Gu'gii la soo dhaafay. Qiimaha biyuhu waxay gaareen heerarkii Jiilaalka (50,000-80,000 ShSo/200 oo Litir). Goobaha qaar, biya dhaamis ayaa ka socday tan iyo Jiilaalkii 2008. Daaqa iyo dhirta Hawdka iyo Nugaali wax yar ayay dib u soo cusboonaadeen sababtoo ah roobabka oo liitay iyo daaqa oo ay ka badiyey tiro badan oo xoolo ahi. Badi qoysaska dhaqaalahoodu uu yahay dhexdhexaad iyo kuwa ladani waxay u guureen Sool, Cadduun iyo Hawdka Togdheer horraantii bishii 5aad. Dadka ka tirsan qoysaska saboolka ahi goobahoodii ayay ku hareen, iyagoo awoodi waayey kharshka gaadiidka ee la xiriira guuridda, dakhligooda oo kooban dartiis, taasoo ay sabab u tahay tirada xoolaha iibka geli kar oo xaddidan.

Helitaanka suuqyada ee bariiska iyo daqiiqdu wuu ka hooseeyaa caadi. Kooxaha saboolka ah iyo kuwa ay hantidoodu dhexdhexaadka tahay fursad-u-heliddooda dalaggu way kooban tahay qiimaha kordhay iyo saadka suuqyada oo aan ku fillayn dartood, oo keenay in labadaas kooxoodba ay u wareegaan inay iibsadaan dalag ka jaban. Sidaas darteed, qiimaha gallayda iyo haruurku isna aad ayuu u kacay oo wuxuu kordhay 265% (gallayda) iyo 165% (haruurka) laga billaabo bishii 7aad ee 2007 ilaa bishii 7aad ee 2008 siday u kala horreeyaan; waxana uu ka sarreeyey celceliska 5 sano 310% iyo 210% (2003-2007). Qiimaha bariiska iyo daqiiqda dibedda laga keeno bishii 7aad ee 2008 wuxuu ka sarreeyey 381% iyo 318% qiimihii bishii 7aad ee 2007 iyo 580% iyo 510% oo uu ka sarreeyey qiimaha bisha 7aad ee celceliska 5 sano, siday u kala horreeyaan. Sidaas darteed, awoodda wax iibsiga ee bulshooyinka xoola-dhaqatada iyo magaalooyinku aad ayuu hoos ugu dhacay Gu'gii la soo dhaafay. Iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya rida daabaxa ah iyo bariisku bishii 7aad ee 2008 wuxuu ka hooseeyey 54% siduu ahaa bishii 7aad ee 2007 (isagoo ka soo dhacay 43.41kg/neefkii noqdayna 20.17kg/neefkii ) 61% ayaanu ka hooseeyaa celceliska 5 sano. Rida teyada dhoofinta leh waxa lagu beddeshaa ilaa 22.32 kgs oo bariis ah, taasoo ilaa 55% ka hoosaysay siday ahayd bishii 7aad ee 2007; iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya shaqada iyo dalaggu hoos wuxuu u dhacay 60% siduu ahaa bishii 7aad ee 2007 iyo in ku dhow 70% celceliska 5 sano.

Falanqaynta Nafaqada ee isku xiran ee FSAU ee Guga 2008 kadib waxay muujinaysaa xaalad nafaqo oo **Adag** inay ka jirto Golis, Gaagaab iyo dooxada Nugaal, iyo xeebta Deex, iyadoo oogada Sool iyo Karkaar ooy weli ku jiraan xaalad **Feejignaan** ah oo sii socota. Xaaladda nafaqada ee hab-nololeedyada reer guuraaga ee Hawdka iyo Cadduunka weli waxay ku jirtaa Halis iyadoo aanay wax weyni iska beddelin sidii ay ahayd falanqayntii Deyrtii 2007/8 kadib. Gaalkacayo iyo Garoowe, xaaladda dadka ku barakacsan magaalooyinkaasi weli waa mid **aad Halis u ah**, heerarka cudurrada oo sarreeya, fursad-u-helidda cuntada, biyaha iyo faya dhowrka ee xeryaha dadka soo barokacay oo liita dartood. Baahida loo qabo qaab hab-nololeed oo dhisan oo loogu talagalay dadka soo barakacay, iyo weliba fursad-u-helidda adeegyada lagama maarmaanka ah oo xaddidan, ayaa waxyeelleeyey xaaladda nafaqada ee dadka.



*Daaqa oo liita, Tuulada Ceelgaal, Awdal, Julay '08*

***Waqooyi-galbeed***

Xaaladda hubinta cuntada iyo hab-nololeedka ee qaar ka mid ah goobaha reer guuraaga iyo beero-iyo-xoola-dhaqatada ee gobollada waqooyi-galbeed way ka sii dareen marka la eegay siday ahaayeen qiimayntii Deyrtii 2007/8 roobabka oo xilliyo is xiga aan lagu guulaysan iyo sicir barar sare ayaa keenay in heerar sare oo xoolaha ah la iibiyo dartood. Sidaas darteed, beero-iyo-xoola-dhaqatada Togdheer iyo hab-nololeedyada reer guuraaga ee Hawd, Sool iyo dooxada Nugaal iminka waxa lagu tilmaamay inay ku jiraan xaalad ah **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX).** Iyadoo ku xiran natiijada ka soo baxda roobabka Deyrta 2008/9 iyo heerka sicir bararka ee dhowrka bilood ee soo socda, waxa jirta **Halis Dhexdhexaad** oo ay ugu jiraan inay galaan **Gurmad Bina'aadaminimo (GB)** dadka saboolka ahi intaanu sannadkani dhammaan.Hab-nololeedyada beero-iyo-xoola-dhaqatada ee Awdal iyo Galbeed waxa lagu tilmaamay inay ku jiraan **Hubin La'aan Cuntada ah oo aan Caddayn** oo ay la socoto **halis sare** oo ah inay galaan **XCHAX**. Xaaladdan guud ahaan sii xumaatay darteed, tirada dadka ku jira **GB** iyo **XCHAX,** oo ay ku jiraan dadka ku barakacsan gudaha ee goobahaas jooga, aad ayay u korortay iyadoo ka kacday134,000 oo ay ahayd bishii 4aad ee 2008 noqotayna 370,000 bishii 7aad ee 2008.



*Nirgogeel oo Qaba Cudurka Maqaarka, Golis, Awdal, Julay '08*

arrimaha gobolka ee soo shaacbaxaya

Roobabkii Gu'ga 2008 guud ahaan caadi way ka hooseeyeen badi qaybaha waqooyi-galbeed (20-40% RFE); hase yeeshee, dhowr goobood ayaa helay roobab caadi ah, gaar ahaan Galbeedka Golis iyo qybo ka mid ah Nugaal iyo Hawd (150-200mm) (eeg Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU, Bisha 4aad-Bisha 6aad ee 2008). Halitaanka iyo fursad-u-helidda biyuhu waa caadi hab-nololeedyada Golis iyo Nugaal laakiin way liitaan haab-nololeedyada bannaanka Sool, Nugaasha Kore iyo Hawd. Bannaanka Sool, Nugaasha Kore, koonfurta galbeed iyo waqooyiga galbeed ee hawdka Togdheer iyo qaybka koonfurta ee gobolka Galbeed oo helay roobabka aad uga hooseeya caadi (20-40% ee roobabka caadiga ah ), goobahaas oo la filayo inay la kulmaan biyaha oo aad uga yaraada kadib xilliga xagaaga.

Xaaladaha jirka xooluhu waa caadi ama way liitaa helitaanka daaqa oo aan fiicnayn dartiis, taasoo ka timi roobabkii caadiga ka hooseeyey. Helitaanka caanaha geelu wuu liitaa ama waa caadi. Heerarka dhalmada xoolaha ee Deyrta 2008/9 waxa la filayaa inay hoosayn doonaan, heerarka rimidda ee xoolaha yaryar oo hoosaysay Gu'gii 2008 darteed iyo Deyrtii 2007/8 geela. Xaaladaha roobabka ee aan wanaagsanayn, tirada xoolaha la iibiyey ee korortay, cudurrada ku dhacaya xoolaha ee kordhay dartood, tirada xooluhu aad ayay hoos ugu dhacday (hoos u dhaca tirada geelu waxay ahayd 16%-38%; adhiguna 30%-78%); hase yeeshee, weli way ka sarreeyaan heeraarka caadiga ah,marka laga reebo meelo bannaanka Sool, oo aan dib uga soo kabannini abaartii 2004.

7dii bilood ee u horreeyey 2008, sayladda hilibka lagu qalo ee Burco waxa laga dhoofiyey isku dar dhan 96,798 oo neef hilibkoodii, taasoo 217% sarraysay marka la barbar dhigo isla muddadaas ee 2007 (30,548 oo neef); tan waxa u sabab ah dalabka loo qabo hilibka la qaboojiyey ee dalalka Gacanka Carabta oo kordhay. Dhoofinta xoolaha bishii 1aad ilaa bishii 7aad ee 2008 la mariyey dekedda Barbera isku darkoodu wuxuu ahaa 346,153 oo neef taasoo 84% ay ahaayeen ari. Tiradani 15% ayay hoosaysaa marka loo eego isla bishii 1aad ilaa bishii 7aad ee 2007 (405,973 oo neef), waa mid ka mid ah tiradii ugu hoosaysay ee xoolaha la dhoofiyey tan iyo 2001.

Goobaha beero-iyo-xoola-dhaqatada ee waqooyi-galbeed, soosaarka miraha ee Gu'ga/Karakta 2008 waxa lagu qiyaasay 10,500MT, taasoo ka dhigan 42% Gugii 2007, 56% celceliska dagaalka kadib, iyo 43%celceliska 5 sano. Saadka dalagga gudaha ee suuqyada ugu waaweyni waa caadi qiimaha dalagga oo sarreeya dartiis, taasoo keentay in beero-iyo-xoola ay iibiyeen dalag dheeraad ah, sidaas darteed qoysaska ay hantidoodu tahay dhexdhexaad iyo kuwa ladani waxay haystaan kayd ku fulan 2-3bilood oo keliya.

Falanqaynta nafaqada ee hadda ee Gu'ga 2008 kadib waxay muujinaysaa in xaaladda nafaqada ee badi gobollada waqooyi-galbeed ay ka sii dartay tan iyo Deyrtii '07/08. Iminka, xoola-dhaqatada hab-nololeedyada Hawdka, Bariga Golis/Gebi ee Sanaag, bannaanka Sool-Sanaag, iyo Guban waxay lagu tilmaamay inay ku jiraan xaalad **Halis** ah., iyadoo dooxada Nugaal iyo beero-iyo-xoola-dhaqatada Galbeed ay ku jiraan xaalad **Adag**.

Hab-nololeedka Galbeedka Golis (reer guuraaga Golis ee Awdal oo dhaqda geel iyo ari) waxa weeye goobta qura ee xaaladdooda nafaqo ay wali sii tahay **Feejignaan** sidaas oo lagu qoondeeyey Deyrtii 2007/8 kadib. Xaaladda nafaqo ee dadka ku barakacsan gudaha Hargeysa way ka sii dartay iyadoo hore u ahayd xaalad **Adag** Derytii 2007/8 waxana ay noqotay xaalad **aad Halis u ah.** xaaladda nafaqada ee dadka ku barakacsan magaalooyinka Burco iyo Berbera way kasii durugtay **Halis**nimadii waxayna noqotay mid **aad Halis u ah**. Hab-nololeedka beero-iyo-xoola-dhaqatada waxa lagu tilmaamay inay ku jiraan xaalad **Adag** taasoo ka soo dartay heerkii hore ee ahaa Feejignaan xilligii Deyrtii 2007/8 ka dib.



*Barket meran, Sool, Tuulada Lafaweyne, Julay '08*

**Warbixinaha iyo war saxaafadeedyada dhowaan soo baxay iyo kuwa bixi doona**

*War Saxaafadeedka FSAU ee 26kii Bisha 8aad ee 2008*
*Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWSNET ee bishii 8aad ee 2008*
*Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET ee bishii 8aad ee 2008*
*Warbixinta Nafaqada ee FSAU ee bilaha 7aad-8aad ee 2008*
*Warbixinta Taxanaha Farsamada ee FSAU, Falanqaynta Guga 2008 Kadib, Bisha 9aad ee (oo soo socda)*

*XUSID: Warbixinaha iyo war saxaafadeedyada kor ku xusan waxa laga helyaa websaytka FSAU: www.fsausomali.org*

Technical & Managerial Support

European Commision

Funding Agencies